


HAL-DOOR

**“Han-Dadaala Yeelo
Inaad Heego Gaartana
Hanka Lagama Gooye
Qeyrkaa Hareer Soco..”**



Omar Mohamed Ismail(Author)

Hordhaca buuga Hal-door

Dhigane iyo dhigaal

Mahad oo dhan Rabi bay u sugnaatay .Allaha ii suurtageliyey hirgelinta buugan iyo qoristiisa.

Hal-door waa dhigane qoraaleed Dhaxal iyo dhito ma guuraan ah.

Waa dhigane diirada saaraya dhacdooyin sheekooyin iyo dhiirigelin dhaxal reeb ah.

Waxa uu soo koobayaa Sheekooyin dhamaantood salka Ku haya anfac mustaqbaleed.

Waa Sheekooyin dhiirigelin ah dhamaantood aan ugu talagalay jiilalka maanta iyo kuwo dambaba.

Sababta igu kaliftay qorista buugan iyo soosaarista waa baahida loo qabo kobaca maskaxeed adeegsiga Sheekooyin tayo leh iyo duurxulid miisaan weyn Ku fadhida.

Wuxuu mar labaad xoojiyinayaa kor u qaadista Ku baraarugsanaanta qiimaha qoraaleed iyo akhriseed Waa dhigane iyo diwaan soo ururinayaa Sheekooyin ay yartahay adeegsigoodu

Waa kuwaas oo halis ugu jira inay dabar goaan.

Waa hadhac aqooneed iyo laabeen xigmadeed aan hadyad uga dhigay akhristayaasha buugan.

Hibayn

Dhiganahan waxaan u hibeeyey dhamaan dhalinyarada Soomaaliyeed Iyo inta afka Soomaaliga ku hadashaba. Waxaan si gaar ah ugu hibeeyey Dadyowga ku heelan horumarinta Naftooda Iyo Bulshadoodaba.

Taariikhda Qoraaga

Qoraaga buuga haldoor waxa uu ku dhashay magaalada badhan ee gobolka sanaaag.

Waxa uu dugsiga quraanka ka bilaabay magaalada bosaaso. Yaraantisu waxa uu ahaa shakhsi jecel akhriska iyo qoraalka. Waa shakhsi lagu soo barbaariyey dhaqan wanaag diin jacayl iyo asluub wanaagsan. Sido kale waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ilaa sare wuxuu ka bilaabay kuna soo afmeeray magaalada bosaaso.

Cumar waa qoraaga buuga haldoor waa mufakir hal-abuure iyo qalinmaal.

Wax ku qora luuqada afsoomaaliga. Waa shakhsi hormuud u ah tabinta qoraal farshaxamaysan.

Waxa uu u hibo u leeyahay gudbinta iyo qorista sheekooyin iyo xigmado asluubaysan

Waa shakhsi ku astaansan fikir xor ah.

Cumar waxa uu ku hadlaa afar luuqadood kuwaas oo kala ah Somali English amxaari iyo urduu.

Waa barbaariye umadeed ku xeeldheer helida jiilka dhisan qoraalo xigmadeed. Waa muraayad laga dheehdo qisooyin dhab ah.

Waxa uu soo gudbiyaa barnaamijka hano hankaaga. Waa barnaamij qaybihiisa kowaad iyo labaad uu ku qabtay magaaloyinka hargaysa iyo boosaso.

Soosaarista buugaag anfacaya jiilka maanta iyo Kan mustaqbalkaba. Soo gudbinta xigmado iyo sheekooyin duluc iyo ujeddooyin qiimo leh

Waa ahdaafta qoraaga buuga. Fikrado isu dheelitiran ka dheeho qoraaga qalinka hufan.

Waa hormuudka iyo shakhsiyaadka ugu firfircoon dhalinta gayaankiisa. Waa dhigane uu akhrisan karo qofkastoo danaynaya.

Tusmo

1. Hordhac.....	02
2: Hibeyn.....	02
3: Taariikhda Qoraaga.....	03
4: Wacdarihi Randian.....	06
5: Nimcooyinka la moogan yahay.....	06
6: Abaalki Hirgilay.....	07
7: Marwadii Iyo Maktabadii	08
8: Boqorkii Arxanka darnaa.....	09
9: Dawadii Iyo Aduunyadii.....	10
10: Caalimkii laga Fahmay 9 ka Cashar.....	10

11: Muxuu Shaaha ula soo Daahay.....	12
12: Boqorkii raadiyey Xigmada.....	12
13: Weligaa Noloshka ka EEG Dhinaca wanaagsan.....	13
14: Laba jirkii Iyo Aayadi.....	14
15: Hal Qof Ayaa Wax Bedela.....	15
16: Caqli laawihi Lampada Sameeyey.....	16
17: Weligaa Noqo qof Han Sare leh.....	17
18: Wax Bixintu Wey Noocya Badan tahay.....	17
19: Saamaha Dulqaadka.....	18
20: Daryeelka Waalidka.....	19
21: Boqorkii Iyo Caanihi.....	19
22: Noqo Qof Aamin Ah Mar Kastaba.....	20
23: Qaxwaha Iyo Noloshka.....	20
24: Guul Ku Timid Riyo.....	21
25: Noloshu Waa Halgan.....	23
26: Dayuuradi Ugu Horeysay ee la sameeyo.....	25
28: Dulqaadku Waa Maalgashiga Ugu Faa'iidada badan.....	27
28: Haku Deg-degin Dhaleecaynta Dadka kale.....	28
29: Maskiinki Hodanka Ahaa.....	28
30: Runtu Waa Waddada Bad-Baadada.....	29
31: Nuurka Indhaha.....	30
32: Mar Kasta Ku Xamdi-Naq Nimcooyinka Eebbe.....	31
33: Saddex Tijaabo oo Lagula Dagaalami karo Qofka Warka xun Qaada.....	32
34: Dardaaran Waalid	33
35: Xeeladaha Qofka Jaahilka Ah	34
36: Alle Hayna Waafajiyo wuxuu Jecel yahay	34
37: Qoyskii Ku Liibaanay Istaqfarta	35
38: Furaha Guushu Waa Samirka	36
39: Dadku Intooda Badan Waxay Arkaan Xumaanta oo Keliya	36

40: Saddexdii Wasiir	37
41: Faqiirki Hantiyey Hoteelka.....	37
42: Tuugsadihii Dhawrsanaa	38
43: Sadaqadii lagu bogsaday	38
44: Weligaa Ha Niyad Jebin.....	39
45: Odaygi Ceelku ku dumay.....	40
46: Malabkii Gadmi Waayey.....	41
47: Madaxweynihii Lixaadka la’aa.....	42
48: Nin Aan Gabadh U Dhalan Waa Gablan.....	42
49: Nuurkii Hanuunka Ayaa Iftiimiyeey Aqalkooda.....	43
50: Qofka Muuminka ahi Waa In uu Ku Qanco Wixii Alle U Qoro.....	44
Garasha La, aanta Nimcada Eebbe.....	45
51: Sawjadii Cabashada Ku Noolayd.....	45
52: Liibaanta Sadaqada.....	46
53: Damqashadii Manjhi.....	48
54: Horumarkii Sunil Bharti.....	49
55: Qofka Dulman Waxba Ma Ilaawo.....	50
56: Hadii Aad Is Moodo Inaad Dadka Ugu Caqli badan tahay Ogow In ay Jiraan Dad ka Caqli badan.....	51
57: Cilmigii Oday Qufaala.....	51
58: Nolosha Boqortooyada Iyo tan Qabriga.....	52
59: Miraha Amaanada.....	53
60: Nin U Soo Islaamay Keliya Inuu Hurdo Helo.....	53
61: Dhacdadii Miskiga	54
62: Dadku Waxay Garabb Kaaga Yihiin Inta Aad Hodanka Tahay.....	55

Wacdarihii Randian

Randian wuxuu Sannadkii 1871-kii ku dhashay British Guiana oo aheyd waddan uu gumaysto Ingiriisku hadase xorowday kana mid ah dalalka ku yaala laatiin Amerika.

Ninkani la yiraahdo Randian wuxuu dhashay isaga oo aan lahayn Lugo, iyo gacmo! Jirkiisu waa madax calool iyo xubinta taranka oo kaliya. Wuxuu noqday qoraa magac leh' aadna ugu xeel dheer 4 luqadood (Ingiriis, Jarmal' Faransiis' Hindi) loogana danbeeyo.

Wuxuu ku caan baxay sameynta, sawirka gacanta iyo xirfado kale oo ka dhigay Nin bulshada dhaxdeeda ka muuqda. Ninkani Randian wuu guursaday wuxuuna dhalay 4 caruur' ugu danbeyn wuxuu ku dhintay 63 jir isaga oo saameyn weyn kaga tagay deegaankii uu ku noolaa iyo adduunkaba.

Nimcooyinka La Moogan yahay:

Nin magaciisu yahay Cabdallah Bincmah ayaa wuxuu ahaa Nin Xubnihiisa ay Shaqeyn waayeen, waxaana u noqday Qof (mayd) oo kale ah, ma Dhaqaajin Karin jirkiisa inta kale Madaxa oo qura ayuuna Dhaqaajin karayey.

Maadaama xaaladaas uu ku jirey ninkaa odayga ahaa ayaa wuxuu is Oran jiray waxaad tahay Qofka ugu Xaaladda Xun Dadka, dabeed Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa la yiri Cabdallah: - Ma lagu Tusaa Qof kaa daran? Markaas ayuu yiri Haa. Dabeedna waxaa loo geeyey Nin sidiisa oo kale ah, laakiin waxaa uu uga sii Liitay, Ninkaasi ma Hadli karo, wax ma Maqli karo, Madaxana ma Dhaqaajin karo.

Intaas waxaa ka sii daran waxaa dhacday in ninkaa Madaxa aan Dhaqaajin karin.mar Ehelkiisa ay Arkeen asagoo Ooyaya oo ilmo ka socoto markii ay sii fiiriyeen ama eegeen bay Arkeen Dhiig, markay sii Raaceen dhiiggiina waxay arkeen in Labo Farood ay Go'an tahay waxa Goosteyna uu ahaa Dooli ama Jiir... waayo asagu ma Qaylin karo, Mana Dhaq-dhaqaaqi karo.

Haddaba, Cabdallah Bincmah Wuxuu Yiri:- Markaas ayaan Ogaaday inaan ku Suganahay Nimco weyn Allaah baana ku mahadsan.

Haddaba Walaal, Marna Ma Qiimeysay Faa'iidada ay kuu leeyihiin Gacmahaga, Lugahaaga, Indhahaaga, Codkaaga, Mar kasta ku Shukri Allaah, Nimcadiisana Xusuusnoow.

Abaalkii Hirgalay:

Wiil Yar Oo Isagoo Faqri Ah Abaal Gabar Yar Ay U Gashey U gudey Isagoo Dhaqtar Weyn Ah.

Wiil yar oo lagu magacaabi jirey **Howard Kelly** oo ku dhashey Gobolka New Jersey ee dalka Mareykanka Bishii February 20-kedii Sanadkii 1858-kii ayaa wuxuu wiilkaan ka dhashay cid faqiir ama sabool ah, wuxuuna subaxii ama aroortii dhigan jiray iskuul, galabtiina wuxuu wareejin jiray oo tuulada ay reerkoodu deganayeen ku iibin jiray alaabo yar-yar oo uu ka raadin jirey lacag uu iskuulka iskaga bixiyo.

Hadaba galab ka mid ah galbihii isagoo wareejinayo alaabtii ayaa waxaa qabatay Gaajo aad u daran maadaama subaxaas uusan quraac helin, lacag uu wax ku gatane muusan haysan, wuxuu ku fakaray in cid ka mid ah reeraha uu wax ka iibinayo inuu waydiisto wax uu cuno, albaabkii ugu horeeyay markuu garaacay, waxaa ka furay, gabar yar oo ay isku da' yihiin.

Wuu isku naxay wuxuuna ka xishooday inuu waydiisto wax uu cuno laakiin wuxuu ku yiri fadlan walaal: koob biyo ah i sii.

Gabadhii yarayd guriga ayay ku laabatay oo waxay u keentay koob caano oo buuxa.

Isagii oo yaaban ayuu cabay caanihii, markaa ayuu waydiiyay: imisaan lacag bixiyaa?

Gabadhii waxay ku jawaabtay: Gaajo ayaan kaa dareemay, hooyadayna waxay Na bartay in naxariis hadii aan falno in aanan lacag ku qaadan.

Howard wuxuu yiri: haddii ay saas tahay, kal iyo laab, waan kaaga mahad celinayaa axsaanka aad ii fashay... **Howard** wuu soo tagay isagoo dareemay naxariis iyo rayn-rayn aanan la suurayn-karin galabtaas.

Sanooyin badan ka dib, gabadhii way xanuunsatay, xanuunkeedii waa lagu wareeray, tuuladii ay joogtay ayaa laga soo kaxeeyay oo waxaa la keenay Cusbitaalka wayn ee magaalada.

Dhakhaatiirtii ka shaqaynaysay Cusbitaalkii lagu soo xawilay waxay isku dayeen in ay ogaadaan xanuunkeeda, markay iyagina ku adkaatay in ay gartaan xanuunkeeda ayaa waxay xaaladeeda la socodsiiyeen dhakhaatiirta ka sarraysa.

Dhakhaatiirtii lala tashtay waxaa ka mid aha **Dr.Howard Kelly**... Markii loo sheegay meesha ay ka timid haweenta xanuunsan wuu isbadalay durbadiiba, dareen ayaana galay, wuxuu ka codsaday dhakhaatiirtii xaalada uga sheekeynaysay in ay u tilmaamaan qolka ay jiipto.

Dhakhtarkii wuu dul yimid haweentii xanuunsanayd, inkastoo xanuun iyo duruuf ka muuqatay laakiin horay ayuu ka gartay. Wuxuu **Dr. Howard** go'aansaday markuu ka soo laabtay qolka ay jiiptay in uu si gooni ah uga war qabo, xaaladeedana uu gacanta ku hayo illaa ay ka bogsanayso, dhakhaatiirtii kalane wuu la socodsiiyay in xaaladeeda saacad saacad loola socodsiiyo. Ugu dambeyntiina waa lagu guuleestay in la daaweeyo oo alle ayaa caafiyay haweeneydii.

Wuxuu **Dr. Howard** ka codsaday xafiiska lacag qabashada Cusbitaalka in Biilka haweeneydaas la soo marsiiyo inta aanan loo gaynin. Warqaddii biilka Cusbitaalka ayuu meesha hoose wax kaga qoray, kadib ayuu yiri: hadda ha loo geeyo.

Haweeneydii oo naxsan oo ka fakarayso lacagta lagu soo dallici rabo inta ay noqon doonto iyo sida ay ku bixin lahayd maadaama uu kharash badan ku baxay, ayaa warqadii loo keenay.

Markii ay warqadda aragtay way ka naxday lacagta qoran iyo tiradeeda, kadib ayay waxay meesha ugu hooseyso warqadda ku aragtay hadal gacanta lagu qoray oo ah “paid in full with one glass of milk” taasoo macnaheeda ah: “Waxaa lagu wada bixiyay hal koob oo caano ah”

Haweeneydii farxad darteed ayaa illin soo dhaaftay, illeen way ka shakisnayd dhakhtarkaan wayn oo subax kasta dul taagan, wajigiisane meel ay ku sheegtane maysan garanayn. Kadib ayay waxay ku tiri: “kal iyo laab waan kaaga mahad celinayaa axsaanka aad ii fashay”

Dr. Howard Kelly wuxuu ahaa dhakhtar ku taqasusay cudurrada haweenka ku dhaca “Gynecologist” oo aad looga yaqaanay dalka Maraykanka waqtigii uu noolaa waxuuna geeriyooday Bishii **January 12-kedii Sanadkii 1943-kii isagoo 84 jir ah.**

Marwadii Iyo Maktabadii:

Marwo Caaliya Maxamed, Gabadhii Maktabaddii Waddankeeda Badbaadisay!

Marwo Caaliya Maxamed, waxa ay shaqaale ka ahayd maktabadda ugu weyn magaalada Basra ee dalka Ciraaq sannadkii 2003-dii waxaana dhacday in Ciidamadii Ciraaq ay soo galaan maktabaddii, dabeedna korkeeda ayey ka dhigteen dhufays ay dayuuradaha iskaga dhiciyaan. Kadib Marwadan ayaa codsatay kutubta, documents-ka iyo muuqaallada qaaliga ah ee maktabadda yaalla in gurigeeda loo raro, si looga badbaadiyo burburka ay dagaalladu sababi karaan.

Nasiib xumo se, soo jeedinteedii iyo codsigeediiba waa laga diiday! Laakiin se, Marwo Caaliya Maxamed, waxa ay go'aansatay in ay buugta habeen nimo la baxdo, oo ay u tahriibiso meel ay ku nabadgelayaan.

Sidii ay **Marwo Caaliya** sheegaysay ayaa dhacday oo, maktabaddii waa la burburiyey! Laakiin, nasiib wanaag, **Marwo Caaliya**, waxa ay badbaadisay in ka badan **30.000** (Soddon Kun oo buug, document iyo xogo kale oo muhiim ah).

Waxaa hadaba dhacday in haweenay Qoraa ah oo u dhalatey dalka Ingiriiska laguna magacaabo **Janet Wynter** ayaa markii ay sheekadan maqashay, waxa ay qortay buug ay carruurta reer Yurub ugu talo-gashay in ay ka bartaan geesinnimada iyo muwaaddnnimada ku jirta sheekada **Marwo Caaliya Maxamed**, waxayna u bixisay "**The Librarian of Basra**" kaddibna waxa buugga loo rogay masrixiyad lagu soo bandhigay dhowr masrax oo caalami ah.

Maktabaddii Basra dib ayaa loo dhisay. **Marwo Caaliya Maxamed**-na buugaagtii ayey ku soo celisay. Waxaana maamulaha guud ee maktabadda laga dhigay Marwo Caaliya Maxamed.

Boqorkii Arxanka darnaa:

Beri baa Nin Boqor ah waxuu ka talinayey dhul balaaran oo qeyraad dabiici ah Alle ku maneystay, dhul beeraad iyo bad kaluunku afka joogo. Nasiib xumo dadka ku hoos nool xukunka boqor tooyada ayaa ah dad faqri ama sabool ah oo nolol ahaan aad u liita.

Boqorkaas dadka uma cadaalad fali jirin, waxaa jiray dad aan dambi laheyn oo lagu xukmiyo dil iyo xabsiyo arxan daro ah iyadoo Hantida dadka ay boqortooyadu sida ay rabto ka yeelan jirtay waxaana la iskugu daray dhac iyo boob.

Qofkii beer tabcada ma uusan heli jirin suuq uu u iib geeyo maadaama boqortooyadu aysan xiriir fiican la laheyn wax ka baxsan xeyn daabka ku hareereysan.

Boqorka ayaa sannad walba mar dadka inta iskugu yeero wuxuu oran jirey ama dhihi jiray qof iga fiican haduu jiro waan u baneynayaa xukunka sidoo kalena Hadii la helo qof isu soo taaga xilka waan ku wareejinayaa iyadoo Dadka inta meel fagaaro ah la isugu keeno hal hal loo weydiin jiray maku qanacsantahay xukunka boqorka iyadoo ay la socoto handadaad iyo cabsi galin markaas ayey dadku dhihi jireen "Haa". Waan ku qanacsanahay boqorka.

Muddo aad u dheer kadib, ayaa maalin maalmaha kamida boqorkii sida caadada aheyd dadkii intuu kulmiyay ku yiri qof iga fiican haduu jiro waan u baneynayaa xilka.

Nin waxaa soo istaagay dadku ay aad u jeclaayeen laguna ogaa daacadnimo, cadaalad iyo dad jaceyl, boqorkii sida caadada aheyd ayuu u bilaabay dadkii inuu weydiiyo su'aashii aheyd

"Maku qanacsantihiin ninkaan inaan ku wareejiyo xukunka" wiil dhalinyara ah oo ugu horeeyay ayaa ku jawaabay "Haa" cod dheer ah, boqorkii ayaa ku yiri "ka fiirso hadalkaas wiilyahow" wiilkii ayaa si' dhiiran ku yiri mar labaad "Haa waan ku qanacsanahay Alle ka sakow waa kii faqriga naga saari lahaa".

Tobankii qof ee ugu horeysay markii ay "Haa" ku jawaabeen ayuu boqorkii gasha kala baxay seef uu gacanta ku sitay, intii hartayna iyagoo dhiifoon ayey raadkii wiilka raaceen oo "Haa" wada yiraahdeen.

Boqorkii ayaa isku dayay in xukunka uu xoog kusii heysto balse nasiib wanaag dadkii iyo halyeygii ay dorteen ayaa gacanta ula tagay ciidankii boqortooyada kana tuuray xukunkii ragaadiyay dadka dhulkaas daganaa.

Boqorkii cusbaa ayaa xushay dadka dadkii ugu xigmad iyo caqliga badnaa, wuxuu sidoo kale cagta mariyay dabadhilifkii u shaqeyn jiray boqorkii hore.

Wuxuu dadkii ka dalbaday in ay is cafiyaan oo isku duubnaadaan si loo helo nabad iyo barwaaqo waarta.

Sidoo kale wuxuu bilaabay olole loogu magac daray "Gacantaada ku dharag" oo qeyraadkii aad looga faa'iideystay.

Boqortooyadiina waxey noqotay mid barwaaqo ah oo aad u xoog badan kana tilmaaman boqortooyinkii la dariska ahaa dadkiina halkaas ayey baraare iyo bash bash ku gaareen.

Dawadii Iyo Aduunyadii:

Haweeney Aqoon Jaamaceed oo Caafimaad ah Aan Laheyn Oo 40 Sanadood Dawo Ay Sameysay Dunida Laga Isticmaalayey!

Tú Yōuyōu waxa ay ku dhalatay dalka Shiinaha waxaana ay isku dayday in ay daawada Duumada ama Kaneecada ka soo dhanbasha hab dhaqameed guun ah oo dalkeeda laga soo adeegsanayey mudo dhan Kun iyo lix boqol oo sanadood aaqirkiini Waa ay ku guulaysatay waxaana Midda la yaabka leh ay tahay marwo **Tú Yōuyōu** ma laha aqoon jaamaceed oo caafimaad ah!

Waxa ay samaysay dawada la yiraahdo **Qinghaosu (sidoo kalane loo yaqaan artemisinin iyo dihydroartemisinin)** oo wax ka taray xannuunkii Malaariyada. Ka dib markii la adeegsanayay ku dhawaad 40 sano hal-abuurkeedii lagulana tacaalay in ka badan 6 milyan oo kiis ayaa sanadkii 2015-kii la guddoonsiiyay abaalmarinta Nobeesha ee Caafimaadka iyada oo gu'gii 85-aad madaxa la gashay!

Dhacdadan ayaa micno gaar ah ii samaysay. Waxaana ay muujinaysaa in si qofi ugu guulaysto hawl uu u faro-qaaday, aanay muhiim ahayn aqoon danbeed/aqoon dugsiyeed, 'Educational background', balse go'aan, isku-day, karti, ku-celcelin iyo adkaysi haddii uu la yimaaddo, uu muran li'i hantiyi doono natiijada rasmiga ah.

Innaga waxa qofkeena karti uu dadaalka ku sii wado waaya waxuu miciinsadaa 'Ninyow ha ku daalin waxan aqoon uma lihid ee faraha kala bax', iyo weero is dhiibidi ka mid tahay sidoo kalena ma helo cid dhiiri gelisa. Malahayga haddii haweeneydaas reer shiine innaga dhalan lahayd kamaynaan yeelneen wax aanan aqoon u lahayn ayaan dawo idiinka samaynayaa!

Caalimkii Laga Fahmay Sagaalka Cashar:

Nin Caalim ahaa oo dadka cilmiga diinta u faa'idayn jiray ayaa maalin maalmaha ka mid ah waraystay ardaygiisii oo muddo 33 sano ah aan mar keliya ka fogaan ka dibna waxuu ogaaday in muddadaas dheer casharrada uu ardaygiisu ka faa'iday ay sagaal keliya yihiin. Haddaba su'aashu waxa ay tahay sagaalka cashar ma yihiin kuwo u qalmayey waqtiga intaas le'eg. Qisadan oo ay xikmad badani ku duugan tahay waxey ku bilaabanaysaa sidan.

Caalimkii ayaa ardaygiisii weydiiyey: Illaa goorma ayaa aynu wada soconnay?

Ardaygii: 33 Sano ayaa aynu rafiiq ahayn.

Caalimkii: Waqtiga intaas le'eg maxaa aad iga baratay?!

Ardaygii: Siddeed Masalo.

Caalimkii: Cimrigaygii oo dhan ayaa aan kuu huray, markaasaad siddeed masalo oo keliya iga faa'idday miyaa?!!

Ardaygii: Been ma sheegi karo, ee sagaalkaas dersi ayuun baan kaa faa'iday muddadaas.

Caalimkii: BAL hadda ii sheeg siddeedda masalo ee aad iga faa'idday?

Ardaygii: ayaa tiriyey, duruusta uu bartay waxuuna yiri:

1. Waxa aan bartay in ruux kastaa uu dunidan ku leeyahay hiwaayad iyo balwad uu jecel yahay oo uu ku raaxaysto, laakiin maalinta uu dhinto ay adduunyada kaga harto. Markaasaan doortay in xasanaadka iyo cibaadada aan ka dhigto wehel iyo jacayl dhab ah, waayo waa shaqada keliya ee la hubo in ay qabriga kuu raacayso.
2. Waxa aan bartay qawlka Alle ee macnihiisu yahay, **“Qofka ka cabsada Hor-joogsiga uu Rabbigii hor-istaagi doono, ee nafta u diida hiwaayadda iyo in ay balwadaheeda raacdo, jannada ayaa hoygiisa ah”** Markaasaan naftayda ka fogeeyey hawadayda, oo aan ku xasilay daacadda Alle.
3. Dadka oo dhan ayaan u fiirsaday, markaasaan arkay in qof kastaa uu si gaar ah u haysto shay qiimo badan ku Ag leh, oo aanu marnaba dayacaad u quurayn. Haddana waxa aan eegay, Hadalka Alle ee macnihiisu yahay, **“Waxa aad haystaan waa uu dhammaanayaa, waxa Alle haystaana waa uu waarayaa”** Markaasaa mar kasta oo aan hantiyo shay qiimo badan, waxa aan u baxsadaa hore Alle si uu isagu agtiisa igu ilaaliyo waana (Sadaqada maalka).
4. Waxa aan arkay dadkii oo dhan oo isugu faanaya, maal, nasab iyo tol. Kadib waxa aan eegay hadalka Alle ee macnihiisu yahay, **“Alle agtiisa waxaa idinku qiimo badan, kiina ugu Alle ka cabsiga badan”** Markaasaan dhexda u xirtay cabsida Alle, si aan Alle agtiisa laan-dheere ugu noqdo.
5. Waxa aan arkay dadkii oo barkoodba barka kale ceebaynayo oo dhalleecaynayo, sababta ugu badan ee keentayna ay tahay xaasidnimo. Kadib waxa aan eegay hadalka uu Alle ku yiri Qur’aankiisa ee ah, **“Annaga ayaa noloshooda adduun u qaybinay” (Risiqa, lacagta, caqliga, fahamka, cilmiga, awoodda iwm).** Markaasaan iskaga tegey xaasidnimadii, dadkiina sharkooda ka dheeraaday. Waxa aanan naftayda ku qanciyeey in qaybtu ay xagga Alle ka timaaddo, markaasaan xaasidnimadii ka bogsaday.
6. Waxa aan arkay dadkii oo barkoodba bar colaadinayo, oo dhiiggooda qubaya, markaasaan haddana eegay, hadalka uu Alle ku leeyahay Qur’aankiisa, **“Shaydaanku cadow ayaa uu idinku yahay, ee cadow ka dhigta. (U garta)”** Markaasaan iskaga tegey colaadda aadamaha oo aan u ban-baxay colaadinta shaydaanka oo keliya.
7. Waxa aan arkay dadkii oo mid kastaa naftiisa u xanuunjinayo, una dullaynayo sidii ay risiq u heli lahayd, oo xitaa mararka qaarkood ay la gelayso wax aan xalaal u ahayn. Markaasaan haddana dib u eegay hadalka Alle ee uu leeyahay, **“Ma jiro noole dhulka guudkiisa jooga, oo aanu Alle risiqiisu saarnayn”** markaasaan nafta ku qanciyeey in aan ka mid ahay noolahaas uu Alle risiqooda dusha u ritay ee dhulka uu ku dhaqay, sidaa awgeed waxa aan ku mashquulay waxa uu Alle aniga igu leeyahay ee waajibaad ka soo bixis ah, isagana (Alle) aan u dhaafay inta aan anigu ku leeyahay oo ah in uu i arsaaqo.
8. Waxa aan eegay dadkii, markaasaan arkay in mid kasta oo ka mid ahi uu ku tiirsan yahay oo uu talo saartay makhluuq kale oo sidisa uun Alle u abuuray, mid maalkiisa iyo risiqa ayaa uu ugu tiirsan yahay, mid danihisa kale, taladiisa iyo talada deegaankiisa ayaa uu ugu tiirsan yahay, mid caafimaadka ayaa uu u daba fariistaa, meel kasta qof ayaa uu u samaystay, markaasaan haddana dib u eegay Qawlka Alle ee macnihiisu yahay, **“Kii Alle talo-sarto”**

Muxuu Shaaha Ula Soo Daahay:

Nin Hindi ah ayaa wuxuu gaaray boosteejada ama halka laga raaco tareenka isagoo sugayay in tareenki uu raaci lahaa yimaado, waxaana loo sheegay in uu imanayo 7:00 fiidnimo taasoo uga dhigneyd inuu hal saac sugo. Wuxuu isku dayay inuu eego waxa ka socda astaanka ama goobta tareenadu ka baxaan si uu waqtiga isku dhaafiyo. Rakaab aad u yar ayaa joogay. Wuxuu arkay koox wiilal ah oo meesha ku ciyaarayay. Wiilashi waxay xirnaayeen dharar dhamaad ama duug ah, waxaana ka muuqatay diif iyo darxumo balse aad bay ugu faraxsanaayeen ciyaartooda.

Wuxuu u baahday inuu shaah cabo maadaama uu qabow yar jiray. Nasiib darro meherada ama maqaayada shaah keliya ee goobtu lahayd waa ka yara fogeyd isaguna Kama tagi Karin boorsooyinkiisa oo dhan. Wuxuu u yeeray mid ka mid ah wiilasha, wuxuu weydiiyay inuu shaah u keeno wuxuuna u dhiibay lacag 5 rupees oo ah lacagta laga isticmaalo dalka hindiya. Wiilkii wuu baxay si uu shaaha ugu keeno.

Waqtigii waa is guray, nus saac ka dib ayaa tareenkii yimi, waana inuu deg-deg u raaco. Wuxuu is tusay in wiilkii lacagti la cararay wuxuuna isku canaantay inuu wiil dibjir ama ciyaal suuq ah uu aaminay. Wuu istaagay si uu boorsooyinkiisa u qaato kolkuu u dhaqaaqay dhinaca tareenka ayuu maqlay cod u qeylinaya oo leh "Babuji, Apki chai" (Mudane, Shaahaagi")

Dib ayuu u jaleecay, wuxuu weydiiyay, **"Maxaad shaaha ula soo daahday?"**

Jawaabti wiilkii siiyay ayaa qalbigiisa taabatay, indhihiisana ilmo ay ku soo istaageen.

Wiilkii yaraa wuxuu yiri, "Waxaa iga lumay lacagti, ka dibna waxaan meheradi ama maqaayadii shaaha aan kaaga soo iibinayey ayaan ka codsaday inaan alaabta u dhaqo si aan shaahaagi kuugu keeno!!"

Walaal nuxurka ama dulucda sheekadu waxa weeyaan Daacadnimada ayaa ah siyaasada ugu wanaagsan!

Boqorkii Raadiyey Xigmada:

Beri baa Boqor ka mid ahaa Boqoradi hore ee dalka Iiraan ayaa maalin ka mid ah maalamaha waxa uu socdaal ku marey gobolo badan oo dalkiisa ah dabeedna dadkiisa ayuu u balan qaaday qofkii uu ka helo xigmad iyo kalmad wanaagsan inuu siin-doono abaal Marin aad u wanaagsan oo lagu farxo.

Boqorkii siduu u wareegaayey magaalooyin badan ayuu markii dambe waxuu la kulmay Nin Oday ah oo da'diisu tahay 90 jir oo beeraya geed Saytuun ah. Markaasaa Boqorkii waxuu ninkii odeyga ahaa uu ku yiri maxaad u beereysaa Geedkaan adigoo da'daa ah waayo sida la ogyahay geedka saytuunku mudo labaatan sano ka badan ayuu ku baxaa waqtigaasna inaad gaari doonto lama oga oo illaah unbaa garanaya.

Odaygi ayaa intuu qoslay waxuu boqorkii ku yiri; dadkii inaga horeeyey wey beereen anaguna weynu goosanay markaa anaguna waan beereynaa si ay u goostaan jiilasha soo socda ee mustaqbalka iman doona.

Boqorkii ayaa hadalkii aad ula dhacay oo ka helay, waxaana uu ku yiri; kalmad wanaagsan ayaad tiri; sidaa daraadeed, waxaan ku siinaya abaalmarin lacag dhan 400 oo dinar... Odaygi ayaa dhoola-cadeeyey, dabadeed boqorkii ayaa weydiiyey oo yiri maxaad u dhoola-cadeysay?

Odaygii ayaa ku jawaabay Geedka Saytuunku 20 sano ayuu ku dhalaa aniguna keygii haddu ii dhalay. Sidaas ayuu wanaaga la sameeyo markiiba leeyahay abaalmarin dhaqso ah.

Qisadan waxaanu ka baran karnaa ummad kasta oo meel kuwada nool in jiilba jiilka ka dambeeya uu u dadaalo siduu uga tegi lahaa ama ugu reebi lahaa dhaxal wanaagsan oo anfaca.

Weligaa Nolosha ka EEG Dhinaca wanaagsan:

Qoraaga la yiraahdo **Ibrahim Al fiqi** oo ah qoraa caan ah ayaa Buugaagta uu qorey waxaa ka mid ah Buug uu ugu magac darey (**Fikirka Wanaagsan**) waxaana qeybo ka mid buugiisa uu kusoo qaatey qiso yar oo dhex martey laba wiil oo dhalinyaro ah oo meel kawada shaqeynayey waxaana la kala Oran jirey **Muncim iyo Samiir**.

Labadaa dhalin yarada ah mudo markii ay meel ka wada shaqeynayeen ayaa waxaa dhacday in shirkadii ay u shaqeynayeen madaxdeedii ay u yeereen waxaana lagu yiri shaqadiinii waan ka maaranay waadna fasaxan tahiin, dabeedna arintaa markii shirkadii labadii dhalin yarada ahaa ay u sheegtay aad bay u walaaceen mid ka mid ah dhalinyaradii ayaa wuxuu yiri hadii shirkadani ay shaqadii inaga eriday Insha allah beriba mid kalaynu helaynaa oo weliba mid ka fiican baynu heli karaynaa ee aynu raadsano, kii kalena wuxuu yiri maya sheekadu sidaas maaha meeshani shaqo lama heli karo waayo shaqadu helistaadu waa ay adagtahay oo shaqooyinka way wada buuxaan cid ina qaadanaysaa ma jirto nimankaa shirkada madaxda ka ahna waa ay ina dulmiyeen halkaasuu ka galay sheekadii.

Wiilashii dhalinyarada ahaa waa ay kala tageen kii dhinaca fiican wax ka eegay markiiba shaquu raadsaday oo wuu u howl galay meela badan ayuu codsiyo u qortay mudo ka bacdi kolba meel markuu tagaba markii dambe Bangi ayuu shaqo ka helay, dabeedna bankigii buu kor uga sii kacay oo dalacey ilaa uu noqday qof bankiga farac ama laan ka mid ah maamule ka noqdey.

Wiilkii kale waxa uu ku dambeeyey walaac iyo walbahaar iyo in maalin kasta uu ku cel celiyo waalay dulmiyey si khaldan baa shaqadii la iiga eryey ka dibna noloshiisa waxa ay noqotey nolol mugdi ah ka dibna uu shaqo waayo hurdada ay ku yaraato, daawashada telefishanka uu badsado Aakhirkiina uu ku abuurmo cudurka isku buuqa (**Mental Distress**)

Dulucda qisadani waxa ay tilmaamaysaa qofka waa sida uu u fikiro hadii fikirkaagu aad dhinaca wanaagsan ka eegto oo aad ogaato noloshan inaad wax qabsan karto adigoo Alle kaashanaya waa ay kuu hagaageysaa noloshu dhinaca fiicana waad ka galaysaa hadaadse wax walba dhinaca xun ka eegto, oo dhinaca mushkilada aad ka eegto ugu dambeyntii waxaad noqonaysaa qof aan meel gaarayn oo nolashiisa inta badan dhibaato ku noolaada waxaana muhiim ah qofka inuu wax walba dhinaca wanaagsan ka eego.

Labo Jirkii Iyo Aayadii:

Beri baa gabar waxa ay Xaramka ku dhex aragtey haweenay qiyaastii 70 sannadood ku dhaw oo indhaheedu ilmo aan kala joogsi laheyn ay ka socdaan, dabeedna gabadhii ayaa haweeneydii weeydiisay maxaa ku helay Hooyo oo sidan aad ugu oyeysaa?

Haweenaydii waxa ay ku jawaabtay waxa sidan iiga ilmayiinaya hadii aan kaaga waramo, waxaa jirta berigii aan gabar qaan gaar ah noqday ayaa waxaan is guursanay nin waxaan is qabnay oo aan wada nooleyn mudo sideed sannadood ah waqtigaasna wax caruur ah iskuma aanan dhalin, ka dibna ninkeygii waxuu guursaday xaas kale oo Alle uu kala siiyey Wiil waxaana arintaa ay igu keentay qalbi jab xoog leh iyo murugo joogta ah.

Mudo laba sannadood ah markii uu saygeega is qabeen xaaskiisa kale ayaa waxaa maalin dhacday in ay Safar u baxeen waxaana la iiga tagey wiilkii yaraa oo laba jir ah.

Markii ay cabaar sii maqnaayeen ayaan waxaan go'aansaday in wiilka yar aan si xun u ciqaabo, dabeedna intaan falkaa guracan ku dhaqaaqin ayaa waxaa soo dhacay Telefon waxaana la ii sheegay in ninkeygii iyo xaaska oo ila qabay ay shil gaari galeen labadooduna ay geeriyooden, ka dibna waxaan sameeyey in aan wiilkii yaraa Silciyo waana aan garaacay ilaa uu ka miir doorsoomo waxaana aan ku dhex tuuray qolkii.

Mudo yar ka dib ayuu wiilkii yaraa soo naaxay isagoo leh "Maama Caano i sii" misana mar labaad ayaan si xun u garaacay waxaana mar kale ku dhex tuuray qolka waanan kusoo xirey.

Waxaa dhacday mudo yar ka dib ayaa waxaa i qabatay hurdo waanan seexday, dabeedna waxaan arkay Riyo aad u xun anigoo si daran la ii cadaabay, gacmahayga budad ama garuun naar ka sameysan la iigu garaacayo, markaasaa mar qura hurdadii kasoo booday mise waxaan maqlay Saqiirkii yaraa oo cod hoose ku leh "Maama Caano i sii" dabeedna intaan aad u naxay ayaan Caano iyo biyo siiyey.

Markii sannado badan ay kasoo wareegeen wiilkii waa uu weynaaday waxuuna weligii ii haystay inaan hooyadii ahay waxaan guursaday 3 jeer laakiin wax caruur ah ma aan dhalin.

Haatan anigu 68 jir ayaan ahay isaguna waa 32 jir waana ninka Xajka i keenay waxuuna mar kasta igu yiraahdaa Maama ama Hooyo, waxaan marka Gabaryahay la ooyayaa wiilkaa yaraantiisa sida aan u silciyey oo u jir dilay xanuunkeda iyo sida uu ii wanaajiyey markii uu weynaaday anigoo cid aan isaga hayn heysan iyo anigoo u sheegi karin waxii dhibaato ahaa ee aan ku sameeyey markii uu saqiirka ahaa "Yaa Allah"

Dulucda qisadu waxa weeyaan in aadamaha oo dhan aanu iska nabad gelino oo aanan waxyeelo u geysan si gaar ahna hadii aad dhashay iyo hadii aad waalid kale u tahayba in caruurta saqiirada ah aan la dilin ama la ciqaabin ee loo naxariisto.

Hal Qof Ayaa Wax Bedela:

Raimundo wuxuu ahaa 77 jir kunool jidadka iyo darbiyada magaalada São Paulo ee dalka Brazil kadib markii uu ku guul dareystay inuu helo guri uu dago, gabbaadna uga noqda qabowga iyo kulaylka.

Wuxuu qori jiray gabayo iyo sheekooyin gaaban dadka jidka maraya ayuu u qaybin jiray isaga oo aan waxba ka qaadanaynin, waxayna ahayd waxa kaliya ee farxad galiya kadib markii ay murugadu isku gadaantay noloshiisa isuwada eg!

Maalin maalmaha kamid ah ayaa waxaa soo martay jidkaas gabar lagu magacaabo **Shalla** oo leh dareen Bini aadamnimo oo weyn, wuxuu siiyay Tix iyo sheeko gaaban oo taabanaysa nolosha dadka ku dhaqan deegaankaas kuwaas oo aan helin daryeelkii ay ubaahnaayeen sida cunto, hooy, caafimaad, waxbarasho iyo biyo nadiif ah.

Qoraalkii aad ayay ula dhacday **Shalla** oo ahayd gabar jecel fanka, qoraalka, iyo suugaanta, waxay garab fariisatay **Raimundo** waqti badanna way la qaadatay si ay wax uga ogaato nolosha iyo aragtida dhibbanahan bushi, baro la,aan, iyo baahidu jirkiisa dileen.

Ugu danbeyn **Shalla** waxay go'aansatay inay caawiso **Raimundo** kana saarto nolosha adag ee uu ku jiro, waxay bilowday in sheekooyinka iyo tixaha uu qoro ku faafiso Internetka iyo baraha bulshada si dad badan ay u gaaraan.

Sheekooyinkii way faafeen waxaana usoo jawaabay **Shalla** hay'addo khayri ah, iyo bulsho badan oo ka xanuunsaday xaaladda **Raimundo** dhanka kalana ka helay qoraaladiisa farshaxamaysan ee sida tooska ah u abaaraya qalbiga qofka.

Muddo yar kadib odaygii 77 jirka ahaa baro iyo nololna midna haysan wuxuu helay nolol wanaagsan guri weyn oo dhamaystirana ayuu yeeshay muuqaalkiisuna wuu isbadalay.

Intaa waxaa dheer inuu noqday qoraa rasmi ah kadib markii madbacad weyn oo buugta daabacda ay go'aansatay in ay daabacdo buugtiisa adduunkana usoo bandhigto hal abuurkiisa waayo aragnimadu ku dheehantahay.

Gabar ka damqatay dhibka haysta aadamaha ayaa nolosha odaygaa badashay, walaal ma ku fakartay inaad ka qayb qaadatid wanaajinta nolosha aadamaha ama ugu yaraan aad dhibkaaga kadaysid?

Caqli Laawihii Laambada Sameeyay:

Tomas Edison Wiilkii Maamulihisii Dugsigu uu ku sheegey Wiil Doqon ah oo Caqliga wax uga Dhimanyihiin ayaa markii dambe noqdey Ninkii Ikhtiraacay aalada loo yaqaano (**Phonograph**) kaas oo sameeya duubista codka iyadoo ikhtiraacisii ugu waynaa ee ilaa hada lagu xasuusto uu ahaa Laambada (Lamp) (electrical component)

Thomas Alva Edison waa nin u dhashey dalka mareykanka waxaase asalkiisa uu kasoo jeedaa wadanka Holland waxaana uu ku dhasahy tuulo lagu magacaabo Milan oo ka tirsan Gobolka Ohio ee wadanka mareykanka Bishii February 11,keedii Sanadkii 1847,kii waxaana uu ku dhintey degmada West Orange ee Gobolka New Jersey ee dalka mareykanka Bishii October 18,keedii.Sanadkii 1931,kii.

Yaraantiisii waxba kamuu baran dugsiyada ay dawladu maamusho sadex bilood mooyee waxaana Maamulihii dugsiga uu dhigan jirey wiilkan **Thomas Alva Edison** uu ku sheegey in uu yahay wiil doqona oo caqliga wax uga dhimanyihiin.

Ka dib markii dugsiga laga eryay waxaa si fiican u xanaaneysay hooyadii waxaana markaa kadib Thomas uu muujiyay fariidnimo iyo maskax badni halkaas oo uu Caalamka ku soo kordhiyay waxyaabo badan oo maanta faa'iidooyin badan ugu fadhiya dunida waxaana waxyaabaha uu alifay **Thomas Edison** ka mid ah" Lambada Nalka ama Leyrka.Meykrifoonka iyo Madbacada maanta wax lagu daabaco".

Ninkani la yiraahdo **Thomas Alva Edison** noloshiisii.waxa uu ka bilaabay shaqada iibinta Wargeysyada oo uu ku iibin jiray barta ay tareenadu ka baxaan waxaana uu arkay oo soo jiitey sida wax loo daabaco waxuuna sanadkii 1862, kii uu bilaabay in uu soo saaro wargeys uu ugu magacdaray (**Grand Trunk Herald**)

Mr Thomas Edison wax kasta oo uu sameeynayey ilaahey ka sakow waxaa mudnaanta koobaad lahayd hooyadii oo ahayd macalin bara dadka suugaanta iyo gabayada iyo sida wax loo akhriyo.hooyadan aadka u fiicaneyd iyadaa wiilkeeda wax bartay kadib markii macalimiintii dugsigu soo eryeen iyagoo ku sheegey dabaal aan waxba baranayn hadana si kasta oo ay maamulkii iyo macalimiintii dugsigii uu dhiganayey **Thomas** ay ku sheegeen doqon misana hooyadii waxay u jecleyn si aad u weyn.

Intii uu **Thomas** ku jirey halgankii noloshiisa waxa kale oo uu kasoo sheqeeyay goob laga diro Telifoonada oo ku taalay goobta laga raaco tareenada taas oo u sahashay in uu sameeyo aalada la yiraahdo (**Telegrapher**) tiligaraaf guulo ayuuna ka gaaray shaqadiisa waxaana kadib uu u guuray magaalda Boston ee gobolka Massachusetts waxaana uu Sanadkii 1876,kii halkaas ka aasaasay xarun cilmi baaris ah waxaanu ku ikhtiraacay aalada looyaqaano (**Phonograph**) kaas oo sameeya duubista codka isagoo labo sano ka dibna ku guuleystey Ikhtiraacisii ugu waynaa ee ilaa hada lagu xasuusto kaas oo ahaa Laambada Nalka ama Leyrka Lamp (electrical component) dhab ahaantiina **ninkani Mr Thomas Edison** dunida kusoo kordhiyey qalabyo si weyn ilaa hada aadamaha uu uga faa'iideysto.

Weligaa Noqo Qof Han Sare leh:

Nin la yiraahdo **Monty Roberts** oo ku dhashey Magaalada Salinas Gobolka California ee dalka Mareykanka Bishii May 14-kedii sanadkii 1935-kii ahna muwaadin reer Mareykan ah ayaa waxa uu yahay nin ay u rumowday riyoooyin iyo himilooyin mudo dheer uu ku taamayey waxaana uu sheegay in waagii uu yaraa ee uu caruurta ahaa inuu ahaa nin han sare leh oo ku hamiyi jirey male wanagsan.

Monty, markuu dhiganayay dugsiga sare ayaa maalin maalmaha ka mid ah waxaa dhacday in nin Macallin u ahaa uu ka codsaday isaga iyo arday ay Iskuulka wada dhiganayeen in ay qoraan qof walba wuxuu rabo inuu noqdo Mustaqbalka dhow, dabeedna **Monty** wuxuu qoray inuu doonayo inuu helo dhul aad u ballaaran oo uu ku xanaaneeyo fardaha ka qeyb gala tartamada caalamiga.

Markii uu Macallinkii eegay waxa uu ku haminaayo Wiilkan, wuxuu siiyay darajo aad u liidata, wuxuuna marmarsiiyo ka dhigay in **Monty** qortay shay caqliga ka fog isla markasna fikradiisu aysan ahayn wax soconaaya ama shaqeynaya, waayo wuxuu yiri Macallinkii wiil faqiir ah ah ayaad tahay meeluu seexdo aan haysan halkee ka keenaysaa lacag intaas dhan ee aad dhulka intaas dhan ku gadanayso, ka dibna fardaha adduunka ugu qaalisan kusoo iibsaneysa,? Haddii xittaa aad riyoonayso wax macaquul ah ayaa lagu riyoodaa ayuu macalinkii ku yiri wiilkii yaraa.

Macallinkii wuxuu mar labaad wiilkii siiyay warqaddii si uu fikrad kale ugu soo qorto, isagoo u sheegay inuu ku qorto wax macquul ah oo uu iska ilaawo tan doqonnimadda ah.

Wiilkii Dhiiranaa ee **Monty**-ahaa wuxuu warqadihii ku qoray erayadaan "Macallin adiguna darajadaada fiican ee aad bixineysa hayso, anigana riyadayda waalida kuula muuqata ayaan haysanayaa".

Monty wuxuu dadaal dheer ka dib oo Alle u sahlay kana dhabeeyay riyadiisii, maantana wuxuu haystaa dhul aad u ballaaran, boqolaal fardo ah, wuxuna ku tababaraa boqolka qof ee daneeya farda fuulka caalamka.

Wax Bixintu Wey Noocya Badan tahay:

Macalin iyo ardaygiis ayaa iyagoo dhex lugaynaya dhul beeraley ah ayaa waxey arkeen kabo duug ah oo uu lahaa miskiin beerta nolol maalmeekeiisa kala soo baxa, xilligii Rawaxaadiisu ama waqtigii gurigiisa uu aadi lahaana uu dhowyahay. Ardaygii ayaa macalinkii intuu fiirshey ama eegey ku yiri "aan ka qarino kabahan ninkan miskiinka ah geedkaasna aan kaga dhuumano si uu u jaahwareero marka uu waayo, inaguna aan aragnee BAL waxa uu sameeyo! Macalinkii ayaa ku jawaabey "Wiilow ma fiicna in dan-yarta farxad iyo qosol laga raadiyo, waan ogahay inaad qoys ladan ka dhalatay balse waxyaaba kaloo badan ayaad farxada ka raadin kartaa ee waxaad lacag yar dhex gelisaa labadiisa kabood, Markaas ayaan ka dhuumanayaa si aan u aragno saamaynta uu arinkaasi ku yeesho.

Ardaygii wuxuu qaatay aragtidaa sidii ayuuna sameeyey, geedkii ayeyna ku dhuunteen! Muda yar ka dib waxaa yimi miskiinkii oo diifta iyo rafaadka ka muuqda ilaahay ogyahay. Markuu kabihii gasho is yiriba mase waxba kabaha ku jira, markuu soo bixiyeyba waaba lacag aad ayuu ula yaabay wuxuuna qaadan waayey sida lacagtaan kabaha ku dhex gashay! Dhinac walba ayuu eegey mana arag cid dhaqaaqda intuu jeebka ku ritey ayuu Ruugaga ama jilbaha dhulka dhigtay, isagoo ilmaynaya gacmahana kor u taagayana ayuu cod dheer ku yiri:

"Rabiyow adigaa mahadaas leh waxaad ogtahay xaaskayga xanuunsan iyo carruurteydii gaajada la il-daran, dhib ayaad iga badbaadisey, dhallaankaygiina waad baahi tirtay". Wuxuna sii waday ilmayntii iyo mahad naqii eebbe isagoo cirka eegaya."

Falkani Ardaygii saamayn yaab leh ayuu ku reebay, wuxuuna ka naxay miskiinka dhiban, markaas ayaa macalinkii weydiyey "Hadda sow Kama farxad badnid haddii aad kabaha ka qarin lahayd? Ardaygii ayaa yiri "Maanta waxaad I bartay cashar lama ilaawaana, waxaana fahmey in siintu farxad iyo raynrayn dheeriya leedahay". Macalinkii ayaa yiri "Hadda baro in siintu noocya badantahay, Cafiska aad aargoosigiisa awoodona siin yahay, Ducada walaalkaaga maqana siin tahay, hadalka wanaagsan siin yahay, dhibis la'aantuna siin tahay".

Ujeedada sheekadu wexey tahay walaal Bixintu wey noocya badantahay ee mida aad awoodo ku dhibca badso, kuna tartan, hana u maleyn in hantiilayaasha keliya siintu u gaar tahay.

Saamaha Dulqaadka:

Waxaa jirey Qarnigii 16'aad Nin (Philosophy). Filasoof u dhashey dalka Talyaaniga oo aduunka oo dhan berigaas aad looga ixtiraami jirey looguna tegi jirey talooyin iyo aqoon kororsi.

Waxaa hadaba dhacdey in maalin maalmaha ka mid ah ay gurigiisa u soo martiyeen niman aqoonyahano ah oo ugu yimid la tashi. Markii ay ragii soo fariisteen ayuu xaaskiisa u yeerey kana codsadey in ay cabitaan u keento martida, oo dabeedna iyadoo xaaskiisu ka jawaabeysa codsiga ninkeeda ayey martidii u keentey cabitaankii.

Ninkii (Philosophy) Filasoofka ahaa ayaa arkey in xaaskiisa weelka cabitaanka ay ugu keentey inuu wasaq yahay oo uu nadiif aheyn dabeedna waxuu xaaska weeydiiyey weelka wasaq miyaa ka muuqata markaas ayey xaaskiisa iyadoo rabta in ay eegto ama fiiriso salka dambe ee weelkii ayey cabitaanka saarnaa foorarisey dabeedna waxaa dhacdey in ragii martida ahaa iyo ninkeeda ay ku dul daadisey cabitaankii.

Martidii iyagoo yaaban ayey su'aal weeydiiyeen Ninkii Filsasoofka ahaa waxaana ay ku yiraahdeen maxaa xaas kaaga dhigey qofka nuucaan ah?

Isagoo ka jawaabaya ninkii su'aasha ay weeydiiyeen ragii martida u ahaa ayaa ugu jawaabey sidan:

Waxaan rabaa oo aan doonayaa inaan ogaado ama qiyaaso heerka dulqaadkeyga inta uu la egyahay.

Dulucda dhacdadaa laga baran karo ayaa waxa ay tahay in dulqaadka uu had iyo jeer yahay shay aad u qiimo badan loona baahan yahay qofka inuu dulqaad badan yeesho...

Daryeelka Waalidka:

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Nin Aabihiis magaalada qado ugu waday ama u kaxeeyey. Odeygu da'ahaan ma yara, caafimadkiisuna ma wanaagsana, gaar ahaan dhanka maskaxda.

Maqaayad ka mida kuwa ugu qaalisan magaalada, ayey yimaadeen, miis fiicanna way ka fariisteen.

Jawiga maqaayaddu aad buu u daggan yahay, dadkuna waxey isugu jiraan kuwo haasawaya, kuwa shiraya iyo qaar keli-keli u howshoon.

Odeygu cuntada si saxa afka ulama gaaro, oo wey ka daadaneysaa, laleelmo darteed, Sidoo kale markuu damco inuu odeygu wiilkiisa wax u sheego kor ayuu u qeylinaya, qofkasta oo soo Ag marana wuxuu leeyahay hebel miyaa.

Dadkii maqaayadda fadhiyey waxey aad ugu mashquuleen ninkii odeyga ahaa, waxey billaabeen nux-nux iyo in ay xantaan. Wiilkii dan Kama galin, hadal haynta dadka iyo daymadoo, wuxuuse ku dadaalay siduu odeyga isagoo qeylinaya ula sheekeynsan lahaa, cuntadana gacantiisa ugu siin lahaa.

Markey soo baxeen ayuu Nin bannaanka uga daba yimid, wuxuu ku yiri wiilkeygiyow ma tabeysaa inaad gudaha wax uga soo tagtay?

Wiilkii wuxuu yiri may, ee maxaan kasoo tagay? "Waxbaad kasoo tagtay, weliba wax weyn, casharbaad kasoo tagtay iyo farriin aad u dirtay dhammaan dadkii daawanayey qadadiina"

"Waxaad dadka dareensiisay cidda ay tahay in la raalli geliyo. Waxaad la qosleysay markey dadku dhibsadaan hadalkiisa, waxaad ka tireysay qoyaanka cuntada, markey ku yaqyaqsadaan, waxaad xasuusisay in ay jirtay waqti uu gacanta kugu hayey, sidaasna aad u hadaaqeysay, mar aadan kala aqoon dad ka midka ehelkaa iyo kan kale"

Daryeel, raalli-geli, xusuuso, dhageyso, oo u dhawoow markasta kuwii ku dhawaa markaad u baahneed, kuwii xannaanada, dulqaadka iyo korinta kula dultaagnaa, waxkasta oo aad ahaydna, doorteyna in ay kaa dhigaan, qof asaaggiis wax la qeybsada meelna iska soo saara. Kuwaas ayey tahay inaad u damqato oo aad raalli-geliso.

Boqorkii Iyo Caanihi:

Bari baa waxa jiray Boqor ka talinayey magaalo, dabeedna maalin ayaa Boqorku wuxuu amray in barkad weyn laga dhiso bartamaha magalaada kadibna dad weynihii ayuu ku amray in qof waliba barkaddaa koob caana ah ku shubo, isagoo uga gol lahaa in uu tijaabiyo daacadnimada dadkiisa, waxaana shardi looga dhigay ruux waliba in aysan cidna arag kolka uu ku shubayo caanaha.

Dadweynihii waxey billaabeen in habeen barkii qof waliba u duso barkadda si uu amarka boqorka u fuliyo, Balse waxa la yaab iyo amakaag noqotay subixii barkadii markii la eegay in laga wayey wax caana ah ha yeeshe taa badalkeeda barkadu biyo la ciireyso.

Markii dadweynihii la weydiiyey sababta qof waliba sidaa u sameeyay, mid walba wuxuu ku jawabay in uu ku fikiray hal koob biyo ah oo uu ku shubo barkadaa in aysan wax saameyn ah ku yeelaneynin maadama inta kale dadweynaha caano ku shubayaan.

Xikmada sheekadu waxa ay tahay:

- Dadkoo si isku mid ah u fikaraa dhibtey leedahay.
- Danaha guud oo laysku halleeyo saameynta ay yeelan karto.
- In qof waliba mas'uuliyadi ka saarantahay hagaajinta wadankiisa.

Noqo Qof Aamin Ah Mar kastaba:

Wiil dhalinyaro ah ayaa la kulmay faras aad u qurux badan oo tuulo ka soo ambaday ama lumey, inankii ama wiilkii dhalinyarada ahaa faraskii dhawr toddobaad ayuu xero ku haystay, dabadeed aabbihii ayaa ogaaday oo ku yiri; "Aabbo, waa khaldan tahay inaad dadka waxooda iska haysato oo aanad u celin adigoo og." wiilkii aabbihii wuxu ku yiri; "Aabbo, lagama yaabo in la ina ogaado ee ii daa."

Hase yeeshee, aabbihii ayaa ku adkeystay inuu celiyo, isaga oo wiilkii aad uga xun arrinkaa ayuu ku dhaqaaqay, markuu gaaray tuuladii laga lahaa faraska aad ayaa loogu soo dhaweeyey.

Caaqilkii tuuladu wuxuu ku ammaanay aaminnimadiisa iyo sida aannu u iibin faraska quruxda iyo xoogga ku caan-baxay, caaqilkii wuxuu inankii dhalinyarada ahaa ku yiri; "Faraskani hiddaheena ayuu ka mid yahay, waxaanse kuugu beddelayaa oo ku siinayaa dahab qaali ah."

Wiilkii wuxuu ku soo noqday aabbihii isagoo dahab qaali ah sita, dabadeed wiilkii aabbihii wuxuu ku yiri; "Aabbo, waad iga saxsaneyd ammaanadii aan celiyey, hanti, farxad iyo sharaf ayaan ku mutaystay inaan ku helo."

Qaxwaha Iyo Nolosha:

Mid ka mida Jaamacadaha Maraykanka, ayaa ardaydii ka baxday mudo ka dib ku kulmeen aqal ama guri uu lahaa macalinkoodii oo hada Da'a noqday oo shaqadii ka fariistay ama hawlgab noqdey.

Waxay jaamacada ka baxeen muddo ka hor waxaanay nolosha ka gaareen meeqaano kala duwan oo intuba guul ku suntanaayeen, mid kastaanaa dagaanaansho xaga aduunyada iyo bulshada dhexdeedaba waa hantiyay.

Salaamo iyo xasuuso hadalo ay isticmaali jireen ardaynimadoodii, ka dib waxaa mid walba uu ka waramay duruufihii shaqo ee uu soo maray iyo nolosha uu waqtigaas la soo hirdamayay iyadoo taasi ay galisay warwar iyo walbahaar ay hadba gabi dhaclayn jireen.

Iyadoo sheekadii halkaa marayso ayaa macalinkii Kacay waxa uu galay halkii cuntada uu ku samaysan jiray kadib waxa uu soo qaaday Kirli Qaxwe ah, Waxaanu Soo qaaday koobab noocyo kala duwan ah oo qaar ka samaysanyihiin dhoobo qaaliya halka qaar ay meel dhexaad iska yihiin qaarna ay yihiin koobab aad u duugoobay oo ay wax ku cabaan dadka aan aduun badan haysanin ama saboolka ah.

Macalinkii waxa uu ku yiri ardaydiisii: soo dhawaada oo kaalaya mid waloo idinka mid ahiba ha qaato koob hana ku shubto Qaxwaha!!

Dabadeeto Mid kastoo ardaydii ka mid ahiba waxa uu qaatay koob si uu qaxwihii ugu shubto, mar labaad ayuu Macalinkii hadlay oo wuxuu yiri: Ma aragtaan koobabka aad qaadateen dhamaan waa kuwii quruxda iyo qaaliga u saaxiibka ahaa, waxaanad dhinac iskaga leexiseen kuwii caadiga ahaa?

Waana garashada qofka bini aadamka ah inuu raadiyo waxa ugu wanaagsan, Lakiin waxaad ogaataan arintani waa arinta keenaysa inaad Werwer iyo Walbahaar Ku Noolaataan.

BAL iswaydiiya waxaad u baahnaydeen wuxuu ahaa Qaxwaha, Laakiin ma ahayn koobabka, Hasayeeshee waxaad u kala dheerayseen koobabkii quruxda badnaa ee waliba qaaliga ahaa.

Hadaba haday Noloshu Tahay Qaxwaha, Shaqada, Aduunyada Iyo Magacuba Waa Koobabkoo Kale ogowna inay yihiin waxyaabo ay koobsanayso nolosha iyo qaab nololeedkuba, laakiin maanka ku hay In Qaxwuhu Sidiisa Ahaanayo Oo Aanu Is Bedelayn.

Guul Ku Timid Riyo: J.K Rowling

Waxaa laga yaabaa inaanad magaca garan laakiin waxaad garanaysaa hawl uu qabtay qofka magacaas leh (**Harry potter**) sheekadaas khiyaaliga ah ee haddana ku guulaysatay iibsigii ugu badnaa, gabadhan qortay sheekadana ay hantiday in ay noqoto qof Taajir oo Billionaire ah sida uu qoray wargeyska Forbes ee ka hadla xaga dhaqaalaha.

Sannadkii 2007 ayaa waxay soo saartay gabadhani qaybtii toddobaad ee sheekada **Harry potter** taas oo ay sugayeen malaayiin qof si ay u akhriyaan sheekadan, Mareykanka oo kaliya waxa laga iibsaday 12 milyan oo buugaas ah hal maalin gudaheed.

Haddaba waa tuma gabadhani sidee ayaanay ku guulaysatay. waa gabar ingiriis ah waxay kasoo shaqaysay Ingriiska, Faransiiska kadibna Portugal halkaas oo ay dhigi jirtay school caruurta wax lagu baro , halkaas ayaanay isku barten nin ay markii danbena is guursadeen waxeyna u dhashay gabar yar.

Dhawr sanno kadib wuu furay ninkeedii kadib markii uu dhex maray muran iyo qas badan ilaa ay arrinkooda soo dhex gashay safaaradda ingiriisku ku leeyahay dalka Portugal. Waxay **Rowling** ku laabatay waddankeedii ingiriiska halkaas oo ay la kulantay waxaanay filayn, Hooyadeed ayaa dhimatay intii ay maqnayd! Arrinkaas oo ku noqday filanwaa warwar badanna ku abuuray.

Rowling waxa ay la dagtay walaasheed oo ku noolayd magaalada **Edinburgh.Sannadkii 1995-kii - Rowling** sannadkaas ayay soddon jirsatay- waxay bilawday in ay qorto sheekada wiilka yar ee samaynaya mucjisooyinka badan ee sixirka ah **Harry potter** kaas oo ay ka heshay markay ku riyootay, waxay ku riyoonaysay iyada oo saaran tareenka sawiro humaag ah oo horteeda soo marayay kuwaas oo qofaynayay sheekada **Harry potter**.

Wagtigaas waxay ku noolayd gabadhani **Rowling** lacag cayr ah oo la siiyo dadka saboolka ah waxaana ay ka qaadan jirtay xukuumadda.

Daabaacaddii Buugga:

Rowling markii ay dhamaysay qorista sheekadan khiyaaliga ah waxay geysay meelaha lagu daabaco buugta ama madbacadaha kuwaas oo ay kala kulantay gacansayr in ay daabacaan sheekadan, **Rowling** may niyad jabin ee waxay waday raadintii waxaana diiday in kabadan 12 Madbacadood!!

Raadin badan kadib waxay heshay Nin haysta Madbacad yar oo ka ogolaaday inuu daabaco buuga, sababta uu ugu qancay waxay ahayd inantiisa ama gabadhiisa yar ee siddeed jirka ah oo u sheegtay in ay aad u yaab galisay sheekadani kadib markii ay akhriday.

Ninkii haysatay madbacadda waxa uu ku xiray gabadhan **Rowling** shardi ah inaanu ku qorin magaceeda buugga ee uu ku qorayo kaliya xuruuf lasoo gaabsaday, waxaanu ku sababeeyay in dadku aanay iibsanaayn buuggan haddii ay ogaadaan in ay qortay gabadhan oo aanay dadku jeclaysan doonin, way ka aqbashay **Rowling** Buuggii waa la daabacay suuqa ayaanu galay, buuggii waxa loo iibsaday si wayn waana lasoo dhaweeyay dad badana way ka heleen sheekadan halkaas oo noqotay bilawgii guusha iyo caan baxa **Rowling**.

Waxay ku dhiiratay **Rowling** in ay qorta sheekadan oo ay dhamaystirto waxaana suuqa soo galayay buugaagta ay qortay oo gaaray toddoba buug waxaana laga sameeyay afar filim. Samayntii Boqortooyada **Harry potter**: sida la ogyahay buugtan **Harry potter** waxa suuqyada lagu iibiyay in ka badan **400 oo milyan** oo buug dhamaan dacadalada dunida, **Rowling** waxay noqotay haweenay Taajirad oo maal qabeen ah.

Rowling waxay noqotay mid ka mid ah shakhsiyaadka raadka iyo saamaynta leh uguna magaca wayn leh Qarnigan, sida uu qoray wargeysa **SUNDAY TIMES** ee ka soo baxay Mareykanka **Rowling** waxa ay noqotay qofka 136 aad ee ugu Hantda badan caalamka, xaga dumarkana waxay noqotay Gabadha 13-aad ee ugu maalgabeensan sannadkii 2001-dii.

Sannadkii 2006 sida uu qoray wargeyska Forbes **Rowling** hantideedu way siyaaday waxaanay noqotay gabadha labaad ee ugu hantida badan caalamka, liiska dadka ugu caansan caalamka waxay noqotay qofka 48-aad sannadkii 2007.

Dulucda sheekada:

Riyadaada waxaad u badali kartaa run kaliya haddii ay kugu jirto doonista ah inaad wax noqoto gabadhan carmalka ama garoobka ahayd ee ay soo mareen dhibaatooyinka isdaba jooga ah haddana ka baxday waxay tusaale u tahay dadka isku dhiibay dhibta ee hankoodii iyo doonistoodii dilay Guusha waxay u baahantahay sabir badan waxaynu sheekada ku aragnay inta madbacadood ee diiday inay u daabacaan buuga iyo sida aanay u quusan gabadhani.

Guud ahaan Biyo dhacu waa inaanu hankaagu yaraan oo aanad ku qancin guusha yar ee aad mar kasta hiigsato meel sare.

Noloshu Waa Halgan:

”Nolushu waa halgan, Nin hanyarina mahano qaado”

Maxamed waa wiil dhalinyaro ah oo ay dhaleen qoys sabool ah oo kunool miyiga. Qoyskiisu waxay lahaayeen 50 ari ah iyo hal rati oo ay ku guuraan. Qoys ahaan waxay ka koobnaayeen Shan qof oo kala ahaa Maxamed iyo gabar walaashiis ah oo ah da’diisa hoos uga yarayd oo la yiraahdo Canab iyo wiil ka yar Canab oo isna layiraahdo Cumar iyo labadooda waalid oo la kala yiraahdo Caynab iyo Cowrala.

Maxamed sida caadiga ah wuxuu ilaalin jiray ratiga, yaraantiisii maalin maalmaha kamid ah isagoo soo dheelminaya ratiga, waxaa u yimi Aabihiis oo markaas dhagaysanayey raadiye. Raadiyahana waxaa kabaxayey barnaamij ka hadlaya ahmiyada wax barashada ay leedahay. **Maxamed** wuxuu aad ula dhacay barnaamijkii wuxuuna go aan saday inuu waxbarto inkastoo aysan u muuqan suurogal.

Maxamed, wuxuu ka fakarayey sidii uu qoyskiisa ugu soo bandhigi lahaa qorshaha uu doonayey taasoo ku qaadatay muddo todobaad ah.

Ugu danbayntii xili habeen ah oo xoolihii la kala xereeyey oo lacawaynayo ayuu **Maxamed** u sheegay qoyskiisa in uu doonayo arrin muhiim ah in u la wadaagayo qoyka oo dan u ah reerka, xubnihii qoyska oo dhan ayaa soo eegay **Maxamed** ka dibna Aabihiis ayaa yiri “oo muxuu yahay arinkaasi bal noosheeg”?

Maxamed oo ay ka muuqato dhiiranaan ayaa yiri, waxaan rabaa in aan waxbarto oo aan noqdo qof aqoonleh! Arintani waxay ku noqotay layaab qoyska, Aabihii ayaa yiri Xagee wax ka baranaysaa inagu waxaynu nahay reer guuraa e?

Maxamed ayaa ugu jawaabay Aabihiis, Aabe waxaan rabaa in la ii geeyo Eedo Qamar si aan iyada ula joogo waxna u barto.

Intuusan oday Caynab hadlin, waxaa arintii aad ula dhacday hooyo Cowrala oo tiri waa arin muhiima arinta uu inala wadaagay **Maxamed** ee waa inaynu waxbarasho gaynaa Wiilka madama ay labadii kale joogaan oo aysan qoyska cidna waxbarasho helin.

Wadatashi qoyska iyo qarabada dhexdooda ah kadib, **Maxamed** waxaa loo ogolaaday waxbarashadii waxaana la geeyey magaalada.

Eedo Qamar oo loo geeyey **Maxamed** iyada qudheedu malahayn aqoon iyo hanti toona, hase yeeshee waxay soo jeedisay in wiilka la geeyo Dugsi Qur’aan iyo Iskuul labadaba.

Oday Caynab oo horay usoo kaxeeyey neef ari ah wuxuu u iib-geeyey suuqa xoolaha, Kadibna, wuxuu soo iibshay Kitaab Qur’aanka kariimka ah, iskujoog dharki iskuulka ah iyo hal buug oo uu ugu talagalay inuu Maxamed ku dhigto Iskuulka. Wuxuuna geeyey dugsi iyo iskuul oday Caynab maalinti dambe miyiga ayuu dib ugu laabtay.

Maxamed waxay macalimiinta iyo ardaydu u sheegeen in loo bahanyahay Shan buug ugu yaraan hase ahaatee arintani way ku adkayd **Maxamed** waayo dhaqaale ma haysan, Odagii wuu tagay Eedadiina wuu ka warqabay oo uma suurobeyn inay u iibiso buugtan cusub.

Maxamed wuxuuna bilaabay in uu aado meelaha qashin qubka ah si uu uga soo urursado buugaag la xooray oo baalal ka banaanyihiin iyo joornaalo cadcad kadibna uu isugu tolo si uu buug uga samaysto.

Maxamed wuxuu jeesjees iyo dacaayad joogta ah uu kala kulmi jiray ardayda iskuulkiisa iyo dadka tuulada qayb kamid ah.

Waxayna u bixiyeen magacyo badan iyagoo eegaya buugtiisa gacan ku samayska ah iyo hugiisa oo aan qurxoonaayn. Balse **Maxamed** waxaas waxba Kama soo qaadin jirin. Wuxuuna nolashaas ku dhamaystay dugsigiisii Hoose/Dhexe.

Tuulada Malahayn Dugsi sare marka **Maxamed** wuxuu ka codsaday qoyskiisa in loo wareejiyo dagmada si uu uga sii wado waxbarashadiisa. Talo is raadraadin qof loogeeyo **Maxamed** waxaa lahelay Islaan la yiraahdo Ceebla, oo ay saaxiibo yihiin Qamar (Maxamed Eedadii) oo Dagan dagmada.

Waxaana loo bandhigay aritii, nasiib wanaag Ceebla way aqbashay arintii waxayna balanqaaday cunnada iyo jiifka wiilka. Hase yeshee wali waxa taagnayd lacagtii iskuulka iyo qarashaadkii kale sida buugtii oo oday Caynab wali lagu sugayo.

Oday Caynab oo u muuqda markaan inuu fahmay ahmiyadda Waxbarashadda wuxuu iibgeyn jiray caanaha iyo wixii kale ee xoolihiisa uu ka helo si uu uga bixiyo lacagta iskuulka **Maxamed**.

Dhanka kale Ceebla oo ahayd qof wanaagsan misna uu qabay oday Diirshe oo ahaa ganacsade ayaa siin jirtay Maxamed lacag u dhiganta hal doolar (\$1) Jimce kasta. Taasina waxay keentay in **Maxamed** uu kaydsado oo labo sano kadib markuu u baasayey fasalka 3aad ee dugsiga sare lacagtiina u gaartay boqol doolar (\$100). Uu kufurto kabar yar oo horyiiley dugsi H/Dhexe ee u dhowaa xaafadii uu kunoolaa.

Maxamed wuxuu aadi jiray iskuulkiisa subixii galinka dambena wuxuu iibin jiray kabarkiisa oo uu ciyaalka ka iibinjiray Jalaato, buugta, qalinmada, macmacaanada iyo waxyabaha kale ee ay ciyaalka iskuulku xiiseeyaan. Habeenkiina wuxuu diyaarsan jiray casharadiisa.

Maxamed wuxuu ahaa shaqsi Dagan, furfuran oo ay jeclaayeen dhamaan macmiishiisu. Taasina waxay keentay in sanad kadib uu kabarkii u badalo Dukaan laga helo intii kabarka iyo dhaamaanba adeegyada dukaamada xaafaduhu bixiyaan.

Markii uu u baasayey fasalka ugu dameeya dugsiga sare **Maxamed** wuxuu aaday reerkoodii wuxuuna horay usiiqaaday adeeg dhamaystiran iyo xoogaa lacaga oo uu kashaqeeyey dukaanka si uu uga soo ducaysto waalidkiis.

Runtiina waxay ahayd lama filaan, waxaa intaas u dheeraa qorshe kale oo ah inuu soo kaxeeyo walaashiis Canab si uu u geeyo dugsi lagu barto farsamada gacanta iyo qurxinta haweenka oo ku yiilay degmada.

Way usuuragashay **Maxamed** qorshihiisii. Canab iyo **Maxamed** waxay yimaadeen degmadii Canab waxa la geeyey iskuulkii farsamada gacanta iyo qurxinta haweenka, subixiina waxay iibisaa dugaanka inta **Maxamed** Jiro Iskuulka.

Maxamed wuxuu yeshay saaxiibo badan maadaama uu yahay wiil dadaal badan oo inbadan oo saaxiibadii kamid ah ayaa usoo jeedisay in uu lacagtan yar ku Tahriibo si uu noloshaan mid ka wacan uga abuuro Yurub madaama uu howlkar yahay.

Hase yeeshee u maysan muuqan waxaasi **Maxamed** oo wuxuu laba jibaaray waxbarshadii isuu fasalka Afraad kaalin fiican uga galo.

Nasiib wanaag **Maxamed** waxa urumoomdey riyadiisi iyo ducadii waalidkii oo waxa uu galay kaalinta koowaad ee iskuulkiisa iyo deegaangiisa guud ahaan.

Taasi waxay keentay inuu **Maxamed** deeq waxbarasho ka helo mid kamida Jaamacadaha deegaankiisa, Maxamed wuxuu aad ugu fiicnaa dhanka hal abuurka iyo dhaqaalaha wuxuuna codsi shaqo u gaystay shirkad ganacsi oo caan ah oo ka howlgasha deegaankiisa, isagoona ka noqday Madaxa wax soosaarka Shirkada.

Maxamed waxa lagu shaqaaleeyey lacag dhan Kun doolar (\$1,000) taasi waxay u sahashay in uu qoyskiisii u samyeeyo Beer weyn oo uu u badalo qoyskii sii xoola dhaqato beeralay.

Maxamed qoyskiisu hadda waa ganacsadada ugu caansan dhanka wax soosaarka Beeraha ee deegaankooda, walaalshiis Canab iyadaa lawareegtay oo iibisa dukaankii waxayna ku haminaysaa inay furato meel haweenka lagu qurxiyo oo ay iyadu khaas uleedahay.

Maxamed waxuu kudhigtaa jamacada lacagla'aan dhanka kale waxa loo wadaa in laga dhigo Maamulaha Guud ee shirkada waayo aad ayaa looga helay aqoontiisa iyo shaqadiisa.

Maxamed wuxuu kuhaminayaa dhowr waxyaabood oo kala ah:

1. Inuu samaysto ganacsi weyn oo isaga khaas u ah
2. Inuu guursado
3. Inuu waalidkiis geeyo xajka
4. Inuu furo iskuul ay waxku bartaan dadka danyarta ahi.

Halku dhiga Sheekada “**Nolushu waa halgan, Nin hanyarina mahano qaado**”

Dayuuradi Ugu Horeysay Ee la Sameeyo:

Wax ka Ogow Sidii ay ugu Suura Gashey Laba Nin oo Walaalo Ahaa Ee Sameeyey Dayuuradii Ugu Horeysey oo Matoor Leh Hawadana u Duusha

Labo Nin oo walaalo ahaa oo la kala Oran jirey **Orville Wright** iyo **Wilbur Wright**.una dhashay dalka mareykanka ayay ahaayeen kuwii ugu horeeyay ee sameeyay dayuurad matoor (machine) leh ee hawada ku duusha.

Ragan walaalaha ahaa sannadkii 1903-dii ayay sameeyeen dayuuraddii ugu horeysay. Hase ahaatee, tii ugu horeysay ee farsamo ahaan isku rakiban ama is-raacsan waxay sameeyeen sannadkii 1905-tii. Inta badan, labadaas Nin iyaga ayaa wax isbaray. Waxayna bilaabeen tusmaynta ama sameynta nakhshadda diyaarad-samaynta oo ilaa iyo hadda laga tusaale qaato. Markii dambana waxay bilaabeen in ay sameeyaan isla markaasna ay iibiyaan Baaskiillada. Lacagtii ay ka heleen ganacsigaas ayay ku hawl-galeen iyadoo sannadihii hore tijaabooyinkii ay sameynayeen ee la xiriiaray farsamaynta dayuuradaha.

Ninka la yiraahdo **Wilbur** ayaa markii hore ku horeeyay xiisaha waxa duula, kadib markii uu akhriyay buug ka sheekeynaya Nin Jarmal ahaa oo magaciisa la oran jiray **Otto Lilienthal** oo isagu ku guuleystay tijaabooyin duulimaad taasoo aheyd dayuurad aan matoor (machine) lahayn, magaceedana uu u bixiyay **Derwitzer Glider**. Diyaaraddaas waxaa loo raacayey kolba dhinaca ay hawadu u socoto. Nasiib darro, **Mr. Otto Lilienthal** waxaa la burburtay diyaarad ka mid ah kuwii uu sameeyay ee aan matoorka lahayn isagoo hawada ku jira, wuxuuna u dhintay dhaawac kasoo gaaray burburkaas taariikhdu markay ahayd **10-kii bishii August, 1896**.

Haddaba, taariikhdu markay ahayd 1899, ayaa **Wilbur Wright** iyo walaalkiis **Orville Wright** waxay arkeen sida ay u duulaan shimbiraha loo yaqaanno **“Birds of Prey”**. Iyagoo si degan ugu fiirsadeen sida ay shimbiruhu u duulaan oo ay baalashooda kolba si ugu dhigaan. Waxay ogaadeen in samaynta dayuurad hawada ku socota ay suurtagal noqon karto haddii la helo saddexdan arrimood: 1. Baalal ama Garbo kor u qaada (wings to lift it), 2. Quwad lagu dhaqaajiyo (power to move it through the air), 3. Iyo aalad lagu hago inta ay hawada ku jirto (a device to control it during flight).

Dayuuraddii ugu horeysay oo ay sameeyeen sannadkii 1899 waxaa baalasheeda lagu weec-weecinayey gacanta oo lagu qabanayey marka dhinac kale loo jihatay (leexinayo). Haddaba wiilashaas walaalaha ahaa, waxay sii kordhiyeen hawshii ku saabsanayd diyaarad samaynta, waxayna sameeyeen diyaaraddii ugu horeysay ee matoor ku duusha taas oo ay uga mid noqdeen dadka taariikhda galay ee loo yaqaano musannifiin (**inventors**) taariikhdu markay ahayd **17-kii December 1903**.

Kicitaankii koobaad ee dayaaraddaasi sameysay waxay qaadatay 12 ilbiriqsi (seconds), kii ugu dambeeyay ee ay isla maalintaas sameysayna waxay ku qaadatay 59 ilbiriqsi (seconds), waxayna socotay ilaa 852 fuud (foot). **Sannadkii 1905-kii** ayaa **Wilbur Wright** iyo walaalkiis **Orville Wright** waxay sameeyeen dayuurad farsamo ahaan isu-dhan oo leex-leexan karta. Diyaaraddaasi waxay hawada ku jirtay muddo dhan saacad barkeed ah (½ hour).

Haddaba markii ay wax natiijo ah kasoo bixi waayeen wada-hadallo ay la yeesheen ciidamadii Mareykanka oo diiday in ay ku guuleysteen samaynta dayuurad ay iibin karaan, ayaa iyagoo ka cabsanaya in si basaasnimo ah looga xado fikradda ay adduunka ku soo biiriyeen, waxay diideen in ay mid dambe kiciyaan ilaa inta ay ka helayaan cid aqoontooda ka iibsata haddii ay noqon lahayd dowlad ama shacab intaba. Waxayna billaabeen in ay si qarsoodi ah duulimaadkooda u samaystaan.

Sannadkii 1909, Orville Wright wuxuu ku guuleystay in uu qandaraas (contract) ka helo ciidamadii mareykanka, wuxuuna u sameeyay dayuuraddii ugu horeysay ee ciidamadu yeeshaan. wiilashaas **Wilbur** iyo walaalkiis **Orville** ayaa cilmiga diyaarad-samaynta u sareeyay Yurub iyo Mareykanba ilaa 1911-kii.

Wilbur wuxuu u dhintay cudurka tiifowga (typhoid-ka) sannadkii 1912-kii. Laakiin **Orville** wuxuu sii noolaa ilaa sannadkii 1948-kii, wuxuuna wax weyn kusii kordhiyay cilmiga diyaarad-samaynta. Waxaa xusid mudan in labadooduba ay dhinteen iyaga oo aan guursan. Waxaana la dhihi karaa in jacaylkoodu uu ku koobnaa ama kusii jeeday samaynta iyo hawl-gelinta dayuuradaha. Waxayna ahaayeen kuwii noo horseeday (**pioneers**) adeegsiga dayuuradaha oo iminka qof kasta oo bani-aadam ah uu wixii kooda aqoonsanyahay.

Dulqaadku Waa Maalgashiga Ugu Faa'iidada badan:

Dulqaadka Oo La ogaaday inuu Yahay Maalgashiga ugu Faa'iidada Badan. Dhacdo uu la Kulmay Halgamaagii **Nelson Mandela**.

Waxaa la soo wariyey in Halgamaagii dadka madow ee koonfur afrika noqdeyna Madaxwaynihii hore ee dalkaas **Nelson Mandela** in ka sakow xaga siyaasada in waagii uu dhalinyarada ahaa in uu ahaa Feeryahan Miisaanka Culus wuxuuna Subax kasta aroorta hore u kalihi jiray inuu ordo oo uu is kululeeyo.

Maalin maalamaha ka mid ah ayaa isagoo ordaya wadada dhinaceeda wuxuu kusoo baxay Haweeney Cadaan ah oo gaari ama baabuur uu kaga Banjarsan yahay wadada, laakiin aan garanaynin sida loo bedelo oo loogu xiro taayarka spare-ka ama keydka ah.

Nelson Mandela ayaa wuxuu haweeneydii waydiiyey ma ku caawin karaa, dabeedna waxay ugu jawaabtay haa. Markaasuu intuu markiiba taayarkii u bedelay ayuu kii kalena u xareeyey. Haweenaydii Cadaanka aheyd oo aanan garanaynin **Mandela** hase yeeshee aad uga maqasha magaciisa idaacadaha ayaa intay Boorsada Furtay waxay soo bixisay lacag xoogaa ah markaas ayey usoo taagtay **Mandela**.

Mandela ayaa lacagtii diiday oo haweenaydii ku yiri waxa aan kuu qabtay waa xaq aad igu lahayd ee ma ahan wax aan lacag ku doonayo. Hadaba haweenaydii oo aad u carootay ayaa candhuuf indhaha kaga tuftay **Mandela** kuna tiri adigoo madow ah ayaan kuu quuray Gacantaydii cadayd inaan wax kugu siiyo markaas ayaad diiday waxaad tahay Daanyeer.

Mandella intuu Candhuuftii iska masaxay ayuu ku yiri waad mahadsan tahay. Nin Cadaan ah oo meesha marayey ayaa ku soo leexday oo haweenaydii ku yiri qalad baad samaysay waayo ma taqaanaa ninka aad Candhuufta ku tuftay sidaasna aad u caayeyso. Iyadoo isla saxsan ayey ku jawaabtay waa daayeer madoow ee maxaan uga baahanahay aqoontiisa ama barashadiisa.

Ninkii cadaanka ahaa ayaa ku yiri ma maqashay waligaa Nin la yiraahdo **Nelson Mandella**, waxay tiri maalin kasta ayaan idaacadaha ka maqlaa. Wuxuu yiri hadaba ninkaan aad sidaas ula dhaqantay isna sidaa kuu caawiyey waa **Nelson Mandella**. Haweenaydii oo aad u yaaban ayaa intay is celin Kari wayday **Mandella** ku tiri Dulqaadkaagii wuxuu kuu noqday maalgashi aan waligaa kaa dhamaan ee ii sheeg meel aan kaala soo xiriiro. **Nelson Mandella** wuxuu u qoray Cinwaanka xafiiskiisa oo uu yiri halkaas ayaad iigu imaan kartaa waqtigaad doonto.

Maalintii danbe Haweenaydii oo ay la Socdaan 2 Nin oo kale oo cadaan ah ayaa **Mandella** xafiiskiisa ugu yimid waxay yiraahdeen waxaan rabnaa inaan ku biirno **ururka ANC** ee markaas u dagaalamayey Burburinta nidaamka Midab takoorka.

Haweenaydii ayaa **mandella** waxay ku tiri Waqtigayga iyo Dhaqaalahaygaba waxaan u Hibeeyey inaan kula dagaalamo sidii aan u burburin lahaa Nidaamka Midab kala sooca ku dhisan ee dalka koonfur afrika ka jira hadda laga bilaabo xubin firfircoon ayaan noqonayaa ee i qor garabkaaga waan taaganahay adiga iyo ragga kale ee halgamayaasha ah.

Waxaan dhacdadadan usoo qaatay walaal haddii uu qof si xun kuula dhaqmo isku day inaad is xakamayso si qofkaas aad u kasbato waayo soomaalidu waxay ku maahmaahdaa “**Cadawgaaga caana macaan ayaa la siiyaa.**”

Haku Deg-degin Dhaleecaynta Dadka Kale:

“Rooti Gubtay Cidna Ma Waxyeelo Laakiin Erayada Naxariis La’aanta Ah Ayaa Waxyeelo Geysta”

Madaxweynihi hore ee dalka Hindiya **Dr. Avul Pakir Jainulabdeen Abdul Kalam** oo geeriyooday Bishii July 27-kedii Sanadkii 2015-kii ayaa isaga oo ka sheekeynayey xiligii uu yaraa wuxuu yiri: “Waagii aan caruurta ahaa, Hooyadey ayaa cuntada noo Karin jirtay. Habeen gaar ah ayay casho ay sameysay miiska u soo saartay Aabe. Waxay ahayd saxan subzi iyo Rooti aad u gubtay. Waxaan sugayay in uu aad u caroodo ama u xanaaqo ogaadana waxuu ka yiraahdo. Laakiin Aabe wuu cunay rootigi wuxuuna I weydiiyay siduu ahaa School-keygi. Ma xusuusto waxaan u sheegay habeenkaa balse waxaan xusuustaa Hooyo oo Aabe ka raaligelinaysa rootiga gubtay, marna ma ilaawayo wixii uu ku yiri: “Gacalisoo, waan jeclahay rootiga gubtay” Habeenkaa intaan Aabe dhunkaday ayaan weydiiyay inuu jecelyahay rootiga gubtay. Gacmihiisi intuu igu soo qabtay ayuu igu yiri: “Hooyadaa maanta oo dhan ayay si adag u shaqeynaysay, aad bayna u daalaneyd. Rooti gubtay cidna ma waxyeelo laakiin Erayada aadka u daran ee naxariis la’aanta ah ayaa waxyeelo geysta!”

Wiilkeygiyow Nolosha waxaa ka buuxa waxyaabo aan dhameystirneyn. Anigu ma ihi Qofka ugu wanaagsan, wax kastana ma aqaan. Waxbaan hilmaamaa marmar sida qof kasta oo kale. Waxa uu waayuhu i baray waa in la aqbalo qof kasta ciladihiisa Lana doorto in loo dabaaldego Lana dhiirigeliyo xiriirka”

Noloshu way gaaban tahay in aad hurdada ka toosto adigoo qoomameynaya. Jeclow dadka kuula dhaqma si wanaagsan, u naxariiso oo cafi dadka kuula dhaqma sida xun.

Ha ku deg-degin inaad qof dhaleecayso sababtoo ah ma sameeyo waxa aad sameyso ama uma fakiro sida aad u fakirto ama si dhaqso ah. Waxaa jirtay xilli adiguba aadan garaneyn waxa aad hada taqaan.

Maskiinki Hodanka Ahaa:

Nin oday oo da’ah misana goblan ah ama caruur aan dhalin hadana Laaji ama Qaxooti ah oo aan degenayn dhulkiisii hooyo ayaa beri waxuu ku noolaa magaalada Alexandria ee wadanka MASAR ku taala...

Wuxuu gali jirey ama uu ku noolaa guri yar oo cariish ama buul ah cid wax siisa ama u gargaartaana ma ay san jirin, hadana noloshiisu waxay ahayd mid layaab leh oo dadka la jaarka ama deriska ahi ay is weydiin jireen tolow yaa quudiya odaygan gaboobay.

Dadku marwalba waxay arkaan isagoo xiran dharka aad u qaaliya, gurigiisa marka ay hormarayaan dadku waxay uriyaan cunto aad u udgoon oo aan ahayn urtii ay ka urin jiriin guryahan caadiga ah. Wajigiisu wuxuu ahaa mid aad u iftiimaaya oo aanay wax diif iyo tacab ahi ka muuqan.

Hadaba waxaa dhacday in Maalin Ciid ah ayaa waxay ay dadkii xaafadu isugu yimaadeen barxad weyn oo lagu tukado salaada ciida iyadoo uu ka mid ahaa odaygii faqiirka ahaa dadka ciidaya ayaa waxa su.aal weydiiyey Nin ka mid ah dadkii meesha joogay oo yiri:-

Adeer waxaan ku weydiiyey dadka xaafada ayaad ka mid ahayd ilaa in muddo ah mar kasta oo aanu wax u qabta is niraahno waxaanu aragnaa adigoo ku nool nolol taayadaba ka fiican wax shaqo ahna ma hayside maxaad quudataa oo aad ku nooshahay’.

Odaygii da, da ahaa wuxuu ku jawaabay jawaab dadkii oo dhan ka yaabisay wuxuuna yiri 'waa runtiin wax camal ama shaqo ah ma hayo cid bani aadama oo ii gargaartaana ma jirto laakiin waxaan la xiriiraa ILLAAHA iska leh uumanka samada iyo arlada oo i quudiya' Ninkii ayaa wuxuu odaygii ku celiyey 'adeer ILLAAHAY anaguba waanu barinaaye ma si naga duwan ayaad u baridaa'.

Odaygii wuxuu yiri 'waxaan ILLAAHAY baryaa ama ku ducaystaa illaahayow ii quudi ama ii arsaq sida aad u quudiso TUKAHA YAR deedna waan helaa waxaan doonayo iyadoo aan ugu tago gurigayga wixii aan ilaahay weydiistey. Ninkii waxa uu weydiiyey odaygii adeer bal iiga waran ducadan maxaa ku duugan'

Odaygii intuu ilmeeyey ayuu yiri 'waa arin cajiiba ILLAAHAY sida uu u quudiyo TUKAHA YAR. waxaa jirta in hooyada tukaha weyni ah marka ay dhasho ee ay beedka ama ukunta dhigto waa ay huurisa ilaa inta uu ka gaarayo xiligii uu dilaacayey, marka uu gaaro xiligii dilaaca ee ay afka ku dhufato ayaa waxa ay rajaynaysaa inuu kasoo bixi doono dhal madow oo iyaga u eg laakiin waxaa kasoo baxda dhalaan yaryar oo cadcad oo aan madow ahayn TUKIHII weynaa waa ay ka argagaxdaa dhasha cad waana ay ka baxsataa. Marka ay sidaa uga tagto dhashii yarayd waxay u baahan tahay wax ay cunto ileen waa nafleye, intaa ka dib ILLAAHAY SWTC wuxuu baalasha dhasha yar kasoo saaraa ama kasoo kaahiyaa UR layaab leh oo ay ka dhashaan DIRXI ka dib dirxigaa ayey dhashii cunaan oo ay ku noolaadaan.

Mudo ka dib waxa maalinba maalinta ka dambaysa is bedesha baalashii midabkoodii oo noqda madaw, maalinta ay wada madoobaadaan ayey hooyadii oo dusha ka ilaashan jirtey kusoo noqotaa oo u timaadaa maadaama uu madowgii ay rabtay uu noqday. Isla marka ay u timaado waxa baaba, an urtii oo waxa suula urtii oo waxa dhamaada dirxigii maadaama ay hooyadii u qaraabayaso cajiibiiib aniguna sidaa ayaan ILLAAHAY u baryaa oo uu iigu quudiyaa sida tukaha yar'

Dabeed waxaa ooyay dhamaan dadkii dhagaysanaayey oo la yaabay habka uu ALLAAH u quudiyo tukaha yar waxayna ku dhawaaqeen **ALLAHU AKBAR JASAKA ALLAHU KHAYR.**

Runtu Waa Waddada Bad-Baadada:

Beri ayaa waxaa dhacay in Laba Nin ay Ceyrsadeen ama eryadeen Wiil yar oo aan la garaneyn waxa uu ka sameeyey, haddaba Wiilkii siduu uu Ordayey ayaa wuxuu arkey meel lagu Dhuuman karo oo Guri camal ah, Guriga Hortiisa waxaa Fadhiyey Oday Waayeel ah, Wiilkii la Ceyrsanaayey wuxuu Odaygii ku yiri:- Adeer waa ley Ceyrsanayaa waxaan rabaa inaan Halkaan ku Dhuunto, Odaygii uma jawaabin, Haddaba, Wiilkii wuxuu iska galay Meeshii, si uu uga Dhuunto Labada Nin ee soo Ceyrsanaaya ama eryanaya, Odaygii oo meeshii iska Fadhiya ayaa waxaa soo maray Labadii Nin oo Raadinaayey Wiilkii, markaas ayey Weydiiyeen Odaygii, waxeyna ku yiraahdeen:- Adeer Wiil yar oo Ordaya ama cararaya Halkaan ma soo Maray, Odaygii ayaa ugu jawaabay:- Haa, wuxuuna ku Dhuuntay Gurigaas,ayuu yiri".

Wiilkii ku Dhuumanaayey Guriga aad ayuu u Naxay Cabsi badana wey soo Wajahday, Balse Labadii Nin ee Ceyrsanaayey waxey is yiraahdeen:- Odaygaan Been ayuu idiin sheegayaa oo wuxuu Rabaa inuu Gurigaan inagu Mashquuliyo, si uu Wiilkana u sii Dheeraado oo aan u Gaari weyno, weyna iska sii Tageen oo RaadisGoodii ayey sii wateen, markii ay Dheeraadeen ayaa waxaa soo baxay Wiilkii yaraa, isagoo Xanaaqsan ama careysan kuna Qeylinaaya Odaygii, wuxuuna ku yiri:- Adeer Adigu Naxariis ma lihid miyaa, miyaadan ii Damqaneynin?

Maxaad ugu Sheegtay meesha aan ku Dhuuntay? Odaygii ayaa ugu Jawaabay Hadal Xikmadeysan isagoo yiri: - Haddey Beentu wax Badbaadineyso, Runtana wax wey Badbaadisaa, haddii aan been u Sheegi lahaa, xaga Rabbina Dembi ayaan ka Galay, Adigana waxaa laga yaabaa inaad Badbaadi laheen, balse hadda Runta ayaa ku Bad-baadisay Wiilkeygiyoow, **Ogow Runta waa Waddada lagu Badbaado.**

Nuurka Indhaha:

“Nimcooyinka Ilaahey Ina siiyey ee aynu Haysano iyo sida aynu Dhugba ugu laheyn”

Nin ayaa waxa uu soo raacay Tareen, kursiga ka soo horjeeda waxaa fadhiyey Nin oday ah iyo wiil dhalinyaro ah oo uu dhalay oo 25 jir ah, wiilku sidii ilma yar ayuu u bood-boodayaa, oo uu leeyahay aabe anigu dhinaca daaqada xigta ayaan fariisanayaa, wuuna faraxsan yahay sidii ilmayar oo Shan jir ah.

Ninkii hor fadhiyey wuxuu yiri waan la yaabay ninkan weyn ee sidii ilmo yar bood-boodaya, mise muddo yar ka dib wuxuu leeyahay aabe, aabe bal eeg dhirtu way ordaysaaye, oo way ina-daba cararaysaaye, waan la yaabay waxaan iri waa hadalkii caruurtu ku hadli jirtaye wiilka maxaa ka siya, waxaan la sii yaabay ayuu yiri ninkii odaygii wiilka dhalay isna sidii ilma yar ayuu ula hadlayaa oo uu marba wuxuu weydiiyo uga jawaabayaa.

Dhul-beeralay ah ayaanu soo marnay mise wiilkii wuxuu leeyahay aabe eeg quruxdan, aabihiina wuxuu leeyahay waa beero oo waa cagaar ama Akhtar midabkoodu, waan la yaabay waxaan leeyahay waaba ka sii daray, mise muddo ka dib ayuu hadana leeyahay, aabe eeg daruuruhu tareenkay cayrsanayaane, muddo markaanu soconay ayaanu soo dhexmaray dhul ay daaqayaan Lo, mise wiilku aabihii ayuu leeyahay eeg eeg aabow, aabihii wuxuu leeyahay aabe waa Lo, midab-yo badan , wiilkii ayaa yiri oo Lo,du ma-sidan ayaa midabadeedu?. Waan yaabay ayuu ninkii yiri.

Ninkii aad ayuu ula yaabay muuqaalka uu u jeedo, wuxuu is-weydiiyey wiilku miyuu xanuunsanayaa oo dhinaca maskaxda iyo Dhimirka ayaa looga jiraa, wuxuu la sii yaabay aabihii oo aan marnab lahayn waar naga fariiso Nin weyn ayaad tahaye, hasa yeeshee marba madax u salaaxaya oo wuxuu weydiiyo uga jawaabaya.

Muddo ka dib wiilkii ayaa seexday, ninkii markuu arkay in wiilkii seexday ayuu ku dhiiraday Odaygii aabihii ahaa, wuxuu ku yiri waxaa haboonaan lahayd wiilkaaga in aad dhakhtar dhinac maskaxda ah gaysid, waliba wuxuu ku yiri odaygii hadaad u baahan tahayna anigaa kuu tilmaamaya dhakhtar wanaagsan,

Odaygii wiilka Dhalay intuu qoslay ayaa waxa uu ku yiri ninkii, runtii Cisbitaal ayaan hadda wiilka ka soo saaray , laakiin maaha cisbitaalka Dhimirka, odaygii oo hadalkii wata ayaa yiri , wiilkaygu muddo dheer oo gaaraysa 25 sanno ayuu indha’laa, oo aanu waxba arki jirin, haddaana Cisbitaal indhaha loogu soo jeexay ka soo saaray, markaa waa markii ugu horaysay ee uu Tareen soo raaco isaga oo indhihiisa wax ku arkaya, markaa wuxuu aad u xiisaynayaa muuqaalka ay ugu horayso hadda ninkii wuxuu yiri mar keliya ayaan isbadelay, oo aan iri waxaad xukuntay wiilka adigoon waxba habsan waxa kale oo yiri ninkii waxaan jiracooday markaan dareemay indha la’aanta xaalkeeda iyo nimcada ilaahay qof kasta uu ku manaystay ee aynaan ku mahdinba.

Waxaa laga maarmaan ah walaalayaal in aynaan inaga oo aan waxba habsan xukun saarin, Soomaaliduna waa ta tiraahda “**Hubsiino halbaa la siistaa.**”

Nimcadda ilaahay Ina siiyeyna haday noqoto caafimaadka, iyo lixaadka sida Indhaha aynu dhugmo u yeelano, oo aynu ilaahay mar waliba ugu shukrino Nimcooyinka aan xadka laheyn ee uu nagu galadeystey.

Mar Kasta ku xamdi-naq Nimcooyin ka Eebbe:

Waxey ahayd gabar lugaha naafa ka ah socodna aan awoodin, wiil deriskeeda ah ayaa gabadhii dabeecad iyo dhaqan wanaag ku jeclaaday inuu mehersadana ka codsaday. Gabadhii markey farxadaa hooyadeed u sheegtay ayey hooyadeed ilmaysay waayo horaa hooyada loogu sheegay in gabadhani madhaleys ahaan doonto weligeed Markaas ayaa hooyadii tiri waa khasab inaad wiilkaan guur doonkaa u sheegto inaad dhalayn ilmo ama caruur.

Gabadhii ayaa tiri hooyo habeen walba markaan tukado ayaan ilaahay ka baryi doonaa inaan hooyo noqdo. Hooyadii ayaa ugu jawaabtey hooyo maxaad saadaal iyo mala awaal isugu maaweelineysaa dhakhaatiirtii oo dhami waxey isku raaceen inaad madhalays ahaan doonto weligaa runta u sheeg wiilka waxbana haka qarine.

Gabadhii wey yeeshay talada hooyadeed waxeyna wiilkii u sheegtay in madhalaysnimo u dheeratahay naafanimada balse wiilkii wuxuu ku adkaystay inuu guursado xlttaa haday ma dhalays naafa ah tahay sidaas ayuuna ninkeedii ku noqday.

Halkaas ayey gabadhii habeen walba markey tukato ku ducaysan jirtey “**Eebow waxaad iga qaaday nimcadii socodka ee nimcada hooyanimada ha ii diidin**”. Ducadaan ayey 14 sano ku duceysanetsey kamana aysan daalin.

ILLAAHEY wuu u aqbalay ducadeedii sadex mataana ayuuna ku sharfay, halkaas ayeyna farxad iyo hooyanimu ku noolaatay gabadhii.

Xikmadda Qisadan ay xambaarsantahay waxaa ka mid ah:-

- 1. in runtu horseed u tahay guusha.**
- 2. in ducada la joogtayo ILLAAHEY aqbalo.**
- 3. Inaan naxariista alle marna laga quusan iyo in eebbe lagu kalsoonaado.**

Saddex Tijaabo oo Lagula Dagaalami Karo Qofka Warka Xun Qaada:

Xilligii ay jirtay dawladdii Cabbaasiyiinta ee xarunta islaamku ahayd Magaalada Baqdaad oo hadda ah caasimadda dalka Ciraaq, ayaa waxa dhacday in nin war xumaan ah xambaarsan uu ula tegay nin aqoonyahan indheer-garad ah, waxaanna labadaas nin dhexmartay sheekadan yar;

Ninkii farriinta siday: Ma ogtahay waxa aan maqlay ee uu kaa sheegay saaxiibkaa?

Indheer-garadkii: Bal horta aamus oo inta aanad wax ii sheegin, waxa aan ku marinayaa saddex tijaabo oo yaryar.” “Waa hagaag ee soo daa tijaabooyinka aad sheegayso,” ayuu ku jawaabay ninkii warka siday.

Indheer-garadkii: ka hor inta aanad waxba iiga sheegin saaxiibkay, waxa fiican in aad marka hore waqti yar qaadato, kadibna aad shaybaadho ama kala shaandhayso waxa aad doonayso in aad tiraahdo ee khuseeya warka aad ii sido.

Tijaabada koowaad.

“Si dhab ah 100% ma u hubtaa in waxa aad ii sido ee saaxiibkay iga sheegay ay run yihiin?

Ninkii warka xambaarsanaa: Maya, ee waan maqlay uun...Oo ma hubo....eeen.

Indheer-garadkii: Waa hagaag, markaa si dhab ah uma hubtid run iyo been inuu yahay.

Tijaabada labaad.

“Waxa aad ii sido ee aad ka maqashay saaxiibkay ma wax wanaagsanbaa? Ayuu weydiyey Indheer-garadkii.

Ninkii warka xambaarsanaa: Maya, wax wanaagsan mahaa ee waa hadal xun.

Indheer-garadkii: Sidaa darteed, wax xun ayaad iiga keenaysaa saaxiibkay oo weliba aanad hubin inuu run yahay.

Tijaabada saddexaad.

“Waxa uu xambaarsan yahay hadalka aad saaxiibkay iiga sido ma wax anniga faa’iido ii leh baa? Ayuu weydiyey Indheer-garadkii, wuxuuna ninkii kale ku jawaabay; “Maya, xaqiiqdii wax faa’iido ah kuuma laha.”

Indheer-garadkii: Hagaag, haddii warka aad iiga keentay saaxiibkay aannu ahayn mid run ah, wanaagsan oo aan wax faa’iido ah ii lahayn, waa maxay danta kuugu jirta in aad iiba sheegto? Kadibna ninkii warka siday oo khajilaad ay ka muuqato ayaa iska noqday isagoo xambaarsan warkiisii.

Sidaa darteed, waxa fiican walaal in aanad ka dhegaysan qofka war kuula yimaada ee weliba jecel inuu kuu sheego wax xun oo uu kaaga sido saaxiibkaa, qoyskaaga, ehelkaaga iyo cidda aad wadashaqaysaan, saddexdan su’aalood weydii, waana tijaabo lagula dagaalami karo qofka warka u kala qaada dadka walaalaha ah.

Dardaaran Waalid:

Dardaaran Dhaxalgal ah ayaa Aabo Waayo Arag ah waxaa uu Siiyey Wiilkiisa oo Noqday Qaan Gaar waxuuna ku yiri:

Wiilkaygiyow, marka keliya ee ay tahay in aad feer iyo gacan adeegsataa, ha noqdo mar aad naftaada ka difaacayso qof gacan kuu qaaday”

Gabadha aad ku arkayso sawirka, masraxa, suuqa, goobaha shaqada, waxbarashada ama shaaracyadu waa Nin kale walaashii, inantiisa ama gabadhiisa ee waxaad ula dhaqantaa sida aad jeceshay in raggu ay ula dhaqmaan walaashaa iyo inantaada ama gabadhaada haddiiba ay nasiib-darro dhacdo in halka ay tani maanta taalla oo kale in ay ku dhacdo.

Waxa aad naftaada bartaa in ay kala shiisho/Shaanndhayso hadalka inta aanu dibnaha soo dhaafin, ka fiirso dhadhanka ereyada iyo kelmaduhu u yeelanayaan dhegaha qofka aad la hadlayso, sidoo kale ka taxaddar sida aad u xulanayso ereyadaada.

Wiilkaygiyow, Baro in qofka aad is khilaafi kartaan, kala aragtina noqon kartaan iyada oo aanay colaad shakhsi ahi idin dhex Marin, nacaybna idinku abuurin.

Weligaa ha ogolaan in qof kale kuu fikiro, adduunyada maanta waxaa jira dad aad u badan oo jecel in qofka ay maskaxdiisa ku shubaan aragtida ay iyagu qabaan. Aaminsiiyaanna waxa ay aaminsan yihiin.

Wiilkaygiyow, in qof kale aad isu ekeysiiyo ama isku dhererisaa waa kalsooni darro. Ku kalsoonow cidda iyo qofka aad tahay, waayo qof kale sida uu yahay ma noqon kartid. Dadku sidaa aad tahay ayey kugu aqbali kuguna iman doonaan”

Weligaa ha iska raaxaysan, iyada oo xaaskaagu hawl adag ku jirto, xitaa haddii ay kugu celceliso in ay iyadu ku filantahay hawshaas, ha ka yeelin ee wax uun ka caawi.

Ninkii ragga ahi waa garanayaa in oohinta ama ilmada ragga aanay ceebi ku jirin, laakiin iska jir ku talax taggeeda iyo in ay kugu badato.

Ha isku dhejin illaa xadka aad aaminsan tahay aragtidaada ama go’aanka aad qaadatay, hana isku mashquulin illaa heerka aad ku qanacsan tahay saxnimadiisa, waxaanad ogaataa in si kasta oo aad isula qumman tahay ay haddana suurtoagal tahay in aad qaldan tahay.

Wiilkaygiyow, Dadku waxa ay kaaga go’aan qaadanayaan (Kugu xukumayaan) sida aad u eg tahay. Waa run in ay taasi caddaalad darro tahay, (Qalad weeye) laakiin, waa sidaa sida ay dunida maantu u shaqayso, sidaa awgeed, taas niyadda ku hay subax kasta marka aad bixitaan u sii labbisanaayso.

Ugu dambeyntii Weligaa naxariista iyo calool-dabaca ha ka tegin, kuna dadaal in aad mar kasta naftaada dhigto halka qofka aad la macaamilaysaa taagan yahay.

Xeeladaha Qofka Jaahilka Ah:

Wakhtigii dawladdi Umaawiyinta, ayaa waxa jiray Nin carab ahaa oo la Oran jiray, **Saalax Ibnu shamsuddin**. Ninkani waxa uu ahaa Nin jaahil ah, balse haddana isla Toosan oon ogayn in uu jaahil yahay, kaligiina isla quman.

Waxa uu ahaa Nin Af-miishaar ah oo dadka haddal ku dar-dara, balse aan aqoon lagu majeerto lahayn. Waxa uu muran kol kasta la dultaagna dadka uu marka aqoonta ku tuhmayey, si loo moodo in uu wax yaqaan. Dadka waxa uu u Necbaa, qofka yiraahda "waxba garan maysid ee wax barro"

Jaahilnimadii ayuu ku gaaray da'da 40-ka. Ninkani, waxa uu caan ku ahaa oo gaadiid u ahaa Dameer. Dadka deganku, waxa ay la yaabi jireen ninkan aan aqoonta lahayn, balse haddana isku haysta in uu wax yaqaanno, Gurigiisu wuu ka durugsana goobta layskugu iman jiray.

Hadaba waxaa dhacday in Maalin maalmaha ka mid ah ayuu goobtii suuqa yimid isago lugaynaya, oon dameer-kii saarnayn. Waxa la weyddiiyay waxa ku dhacay dameer-kiisii ee uu usoo raaci waayey. Dabeedna waxa uu u sheegay dadkii, in uu waayay dameer-kiisi oo uu ka lumay. Nin degaanka caan ka ahaa, gabyaana ahaa, ayaa dadka u sheegay in aanu dameer-ku iska lumine, balse uu iskaga tagay oo u duday, sababna ay u tahay jaahilnimada ninkani. Gabyaagii, si xikmaddaysan ayuu usoo gudbiyay cabashadi dameer-ka, isago oo ka hadalsiinaya dameer-kii, kana dhigaya in uu fariin ka tagay intaanu tagin ka hor.

Waxa uu yiri dameer-kii Sidan:

"Dooda tagistaydu maaha baad iyo biyo aan waayey, waase caddaalad aan waayey. Waan duday, la joogista Ibnu shamsuddiin waxaan ka doortay, in duurka waraabuhu igu cuno oo hilbahayga la waayo.

Haddii Maanta caddaalad dunida ka jirto, aniga Ina shamsuddiin dushayda ma korreen ama ma fuuleen, balse aniga ayaa dusha isaga ka kori lahaa , waayo annigu waxaan qirsanahay oo aan ogahay in aan Dameer ahay, balse isagu ma oga in uu jaahil yahay, "Maalinta wixii ka dambeeyay waxa degaanka looga yaqaanay "Nin-kii dameer-ku garasho dhaamay ama ka caqli badnaa".

Dulucda qisadan ay xambaarsantahay waxa weeyaan waxaa jirto in meelo badan oo Bulshadu ay ku kulanto ayaa waxaa waayahan aad ugu batey dad sida Ninkan oo kale ah kuwaasoo iyagoo jaahiliin ah goob kasta muran iyo jikaar la taagan wax kasta oo ay aqoon u laheyna isaga hadla. Dhabtiina waa dhaqan aan wanaagsaneyn loona baahan yahay in la joojiyo.

Alle Hayna Waafajiyo Wuxuu Jecel yahay:

Sheekh Ahmed Yaasiin Iyo Prof Stephen Hawking oo Labadaba ah Ragg Naafo Ah Ayaa Misana Labadaa Nin Midna Waxuu Noqday Caalim Diinta Islaamka Meel Sare Ka Gaaray Hogaamiyena u Noqday Ururka Xamaas Midna Culunta Sayniska Ayuu Meel Sare Ka Gaaray

Prof Stephen William Hawking oo ah saynisyahan reer ingiriis ah oo dhashay **Sanadkii 1942-kii** ayaa isagoo 21 jir ah xanuun ku dhacay waxuu ku waayay awoodii uu ku socon lahaa ama uu hadal kaga soo bixi lahaa balse wuxuu aaminsanaa **“where there is live there is hope”** hadii aad nooshahay waxaad haysataa fursad nololeed oo rajo leh wuxuu noqday ninkani Saynisyahanada maanta caalamka jooga kuwa ugu waaweyn waxaanu qaatay shahaadada **PHD Cosmology** sidoo kale wuxuu helay cilmi sheegaya **Black holes in the sky, Radiation, Sanadkii 1979-kii** wuxuu noqday **Lucasian professor of methamatics at Cambridge** wuxuu ku guulaystay 12 abaalmarino ah.

Sidoo kale Allaha u naxariistee **Sheekh Axmed Ismaaciil Xasan Yaasiin** ayaa waxaa loogu yeeri jiray Hogaamiyaha Ruuxiga ah ee dadka Reer Falastiin wuxuuna dhashay **sanadkii 1937-kii**.

Sheekh Axmed yaasiin waxuu aaminsanaa in dhulka Reer Falastiin uu ka xorayn doono dhamaan ciidanka Isreal wuxuu ahaa Naafo balse waxa ku jiray hamigaas jihaadka iyo hogaamintaba ah isagoo guulo badana ka gaaray waxaana uu ahaa caalim diinta islaamka meel sare ka gaaray ilaahay naxariis janno ha siiyee.

Dhinaca kalena aqoonyahan Maraykanka u dhashay oo la yiraa **Les brown** ayaa laga hayaa “**ma awoodid inaad ka hortagto wixii noloshaada qadar ah ee kugu dhacaya balse waxaad awooda jawaabta caqligaaga iyo sidii aad uga soo kaban lahayd**”

Diinteenu waxay inna faraysa in hadii dhib inagu dhaco aynu xaga alle u noqono mar kastana baryadiisana aan laga daalin oo la micno ah in aanu qofku ka qancin nolosha.

Qoyska Ku Liibanay Istaqfaarta:

Haweenay muslimad ah ayaa waxay tiri ninkeygii Allaha u naxariistee wuu dhintay ama geeriyooday anigoo da'daydu tahay 30 jir waxaana lahaa Shan caruur ah oo gabdho iyo wiilal isugu jira.

Adduunyada ayaa dhabtii igu madoobatey bey tiri, sidii aan u oynayey ama u ilmaynayay indhaheyga nuurkooda ayaa yaraaday, waxaan is tusay iskana dhaadhiciyey inaan ahay qof aad nasiib xun.

Caruurtaydu waa ay yaryar yihiin, waxaa dhaqaale ahaan nasoo galana waxba nooma taraan, waxaana masariif noo ahaa bay tiri xoogaa ilmaha aabahood nooga dhintay.

Waxay tiri haweenayda maalin anigoo iska fadhiya ayaan furay Idaacada Qur'aanka ee Makkah dabeedna waxaan ka maqley xadiis **Rasuulka calayhi salatu wasalaam ku yiri:**

قال رسول الله صلى عليه وسلم "من أكثر من الاستغفار جعل الله له من كل هم مخرجاً ومن كل ضيق فرجاً"

Markaas ayaan bilaabay inaan Istaqfaarka badiyo caruurtaydana sidaa ayaan ku amrey.

Waxaa dhacday muddo yar ka dib in dhul aanu lahayn oo berri hore oo uu jid ama wado la dhisayey uu maray oo aanu ka samarney xiligii ninkaygu noolaa ayaa nooga timid lacag aad u badan oo malaayiin ah.

Wiilkeyga weyn wuxuu noqday Kan u horeeya Taxfiidka Quraanka mandiqadeyda waxaana masuul looga dhigay dadka tabarta daran waxtarkooda kheyrikii ayaa nagu batay nolol fiicana waan ku noolaaney Illaahayna wuu ii xafiday wiilasheyda iyo gabdhaheygaba.

Wel welkii iyo muragadii i heysay Allaah waa uu iga fayday igana qaaday waxaan noqday qof farxaan ah.Intaasoo dhan walalayaal waa fadliga Istiqfaarka uu leeyahay.

Hadaba Qofka kasta oo naga mida ah waxaan kula dardaarmayaa nafteyda iyo naftiinaba inaan Istaqfaarka badino waxba ma noqaneyno markaad fadhisid hadii aad soconeysid hadii aa shaqo joogtid hadii aad bas sugaysid ama gaari aad kaxeynayso meel kasta saacad kasta inaad weyso qabto kaama rabto.

Sida ugu sareeyso oo loo weydiisto Alle dambi dhaafka waa inaad **tiraahdo Allaahuma Anta Rabii laa Ilaaha illaa Anta khalaqtanii wa anaa cabduka,wa anaa cahdika wawacdika mastadactu,Acuudi bika min shari maa sanactu,abuu'u laka binicmatak calayya wa abuu'u bidanbii faqfir lii fa inahu laa yaqfirul-dunuuba ilaa Anta.**

Furaha Guushu Waa Samirka:

Taabiciga **Curwa Binu Subayr** ayaa waxaa laga jaray lugta xanuun ku dhacay dartiis isla maalintii laga jaray ayay caruurtiisu dhinteen ka dib markii uu Faras haraatiyay. Waxaana uu yiri “Allahayow adigaa mahad leh, Adiga ayaa jira adiga ayaana xagaaga loo soo noqonaya waxaad I siisay wiilal waana aad iga qaaday, waxaad I siisay afar waaxood waxaadna iga qaaday mid, waxaan kaa baryaya inaad Jannada nagu kulmiso.

Maalin kale waxa soo galay Majliska Curwa Binu Subayr oday da’ ah oo indha beelay, waxaana lagu yiri Curwa dhegayso odaygan warkiisa? Odayga ayaa ku yiri “Waxaan deganayn meel doox ah, habeenimo ayaa daad soo rogmaday wuu qaaday xoolahaygii iyo ubadkaygii, waxa keliya ee iiga haray wuxuu ahaa wiil iyo Awr, awrkii wuu iga baxsaday wiilkiina waxaa iga cunay dhurwaa ama Waraabe.

Taabiciga Curwa Binu Subayr ayaa ku yiri “Markaa Maxaad tiri?” Waxaan iri “Waxaa mahad leh Allaha i siiyay qalbi iiman ka buuxo iyo carab mahad naqaya “? Waa kuwaasi dadkii dhibaatooyinka adag ku sabray.

Dadka Intooda Badan Waxay Arkaan Xumaanta oo keliya:

Maalin ayaa waxaa dhacday in Nin Macalin ah oo arday wax u dhigayey uu soo qaaday sabuurad weyn oo Cad, waxaanu ku dhejiyay gidaarka ama derbiga.

Bartanka sabuuradda ayuu ku sameeyay dhibic madow. Markaasi ayuu ardaydii weydiiyay maxaad gidaarkan ku aragtaan? Dhamaantood waxay ku jawaabeen dhibic madow.

Hadda-na wuu ku celiyay kolba mid ayaa isku daya oo yiraahda “Dhibic madow” ama Goobo ama kubada u eg wareega dunida.

Markii ay halkaasi dhaafin waayeen ayay ka codsadeen Macalin noo sheeg?

Macalinka oo yaaban ayaa ardaydii ku yiri: “Gidaarka waxa ku dhejisan Sabuurad Cad oo saafi ah. Laakiin Idinku waxaad arkaysaan dhibicda yar ee madow oo keliya. Sidaasi ayay aadamigu badankiis

Xumaan yar u wada arkaan iyagoo wanaagga faraha badan indhaha ka ilaliya ama ka duwa.

Saddexdii Wasiir:

Xili haatan waqti dheer laga joogo ayaa waxaa dhacday in Nin Boqor ah uu u yeeray sadex ka mid ah wasiiradiisa, wuxuuna ka codsaday arrin ay la yaabeen, wuxuuna u dhiibay mid walba kiish maran wuxuu ku yiri beertayda aada oo dalagyada kala duwan ee ka baxay ka soo buuxiya.

Sadexdii Wasiir waxay qaadeen kiishashkii, mid walibana beertii ayuu dhinac ka galay, Wasiirkii ugu horeeyey mirihii beerta ayuu midba mida ay ka wanaagsan tahay naqeeyey oo ka buuxiyey kiishkii loo soo dhiibay.

Wasiirkii labaad culays isma saarin iskuma-na taxalujin in uu miraha kala doortee, wixii ishiisu qabato ayuu ka buuxiyey kiishkii, Miro bislaaday, kuwo aan bislaan, kuwo qurmay intaba.

Wasiirkii sadexaad wuxuu yiri boqorku wuu iska kiin tijaabinayaaye in aad amarkiisa fuliseene maysagaa eegaya kiishashka oo wakhtiba u haya, halkii ugu horaysay intuu fariisatay ayuu caleen iyo caws wixii uu arkay ka buuxiyey kiishkii.

Waxaa lagu soo noqday boqorka xaruntisii, waxayna la kulmeen boqorkii iyada oo Nin waliba Kiishkiisii wato, Boqorkii isaga oo aan ka hadlin ayuu askartii ku amray in wasiiradda iyo kiishashkooda mid waliba qol gooniya lagu xiri muddo sadex bilood ah, wax cunto ahna aan loo gaynin.

Wasiirkii koowaad mirihii iyo khudaartii uu sida wanaagsan u soo gurtay ayuu maalinba in ama qeyb cunaa, wuuna badbaaday sadex bilood ka dib isaga oo nool ayaa loo tagay.

Wasiirkii labaadna waxa loo tagay isaga oo naftu uun ku jirto, wuxuuna ku noolaa mirihii uu soo gurtay intii wanaagsanayd ee aan qurmin.

Wasiirkii sadexaad todobaadba ma noolayn markiiba isagu gaajuu u dhintay.

Dulucda qisadu waxa weeyaan is qiimee Walaal haddaba adigu sadexdaas wasiir kee tahay.

Maanta dunidaad joogtaa, xor ayaad tahay, waxaadna dhex taagan tahay beertaas, oo la mid ah in aad guratid wanaag ama xumaan, laakiin Bari marka ammaanada lagaala noqdo waa nafta ee qabriga ciriiriga ah, ee madow lagu galiyo kaligaa, maxaad u malaynaysaa in ay kuu gar-gaarayaan waxaan ka ahayn wanaagii intii aad joogtay dunida aad urursatay ama shaqaystay.

Faqiirki Hantiyey Hoteelka:

Charles Kemmons Wilson waa nin u dhashey dalka Mareykanka waxaana isagoo dhalinyaro ah uu ka shaqo bilaabay warshad qoryaha lagu sameeyo, dabeedna isagoo 40 jir ah oo weli ka xoogsada warshada ayaa waxaa dhacday in maalin maalmaha ka mid ah aroor hore ama subax hore uu u yeeray maamulihii shirkaddu, waxaana uu u sheegay in shaqadii laga erayay iyadoon aan loona ogalayn in mar danbe uu shaqo u soo doonto shirkadda.

Mr Charles markii arintaa loo sheegay aad iyo aad ayuu uga naxay Wuxuu ahaa sidii qof dhulku liqay oo madawgiisa ku sii dhex jira waxuuna aaminay in albaabkii risiqu ka soo xirmay isaga iyo xaaskiisa.

Markii uu gurigiisa tagey ayuu u sheegay xaaskiisa in shaqadii mudada dheer uu ka shaqeynayey laga soo eryay, dabeedna xaaskiisa ayaa waxay ku tiri “Maxaanu samaynaa gacaliye”? Waxaana uu ugu jawaabay gurigan aan ku jirno ayaan rahmayaa oo lacagtiisa ayaan dhismayaal ku samaynayaa oo aan sii iibinayaa. Waana ay ka ogolaatay... Markii uu dhismihii ugu horeeyay sameeyay wuu iibiyay, waxaana uu ka helay macaash fiican.

Shan sano oo uu hawshaasi wadey ka dib wuxuu noqday Nin hantiile ama taajir ah. Ninkan **Mr. Charles Kemmons Wilson** waa ninka asaasey mid ka mid ah Hoteelada dunida ugu balaaran maanta ee loo yaqaan "**Holiday Inn**" oo xarunteedu tahay dalka Mareykanka. Waxaana tiradooda ay tahay **2649 Hotel** oo dunida ku baahsan marka la eego tirokoobkii ugu danbeeyay ee la sameeyay Bishii **Septembar 30-kedii Sanndkii 2016-kii**.

Wilson wuxu yiri "Haddii aan ogaan lahaa ninkii shaqada iga eryay maanta halka uu joogo, waxaan siin lahaa abaal marin weyn", waayo isaga ayaa sabab u ah dadaalkayga iyo hantidayda.

Noloshu uma qalanto inaan werwer ku dhamaysano, fashil kastaana maaha Kan noloshaada soo xiraya waxa laga yaabaa inuu yahay Kan kuu furaya albaabka guusha sidaas waxaa yiri **Charles Kemmons Wilson**.

Tuugsadihii Dhawrsanaa:

Waxaa jiray dawarsade curyaan ah oo ka tuugsan jiray maalmaha Jimcaha Masaajid ku yaal magaalada Lahore, Pakistan. Inkastoo uu dawarsade ahaa hadana khudbada wuu la socon jiray. Khudbad ayaa maalin ka hadlaysay muhiimada ay leedahay cunida risiq xalaal ah. Wuxuu ogaaday in ducada aan laga aqbalayn kuwa dakhliga ka soo galo meelo xaaraan ah. Wuxuu isla markiba go'aansaday inuu lacag ka qaato dadka uu yaqaan inay xalaal cun yihiin oo keliya! Lacagti soo geli jirtay maalin kasta hoos ayay u dhacday balse wuxuu ku adkeystay go'aankiisa ahaa inuu noqdo Xalaal cun.

Isagoo sidi ku wada ayuu dhintay. Inkastoo uu ahaa tuugsade aaskiisi waxaa looga soo qeybgalay si weyn. Dad badan oo maamuus leh ayaa yimi qabrigiisa sababtoo ah waxay ogaayeen siduu ugu tanaasulay adeecida Awaamiirta Alle.

Waa baahanahay baqti looma cuno. Dad badan waxay aamineen oraah ahayd "**beggers have no choice**" oo loola jeedo "Tuugsaduhu ma haha Ikhyaar uu wax ku diido ee wixi la siiyo waa in uu iska qaataa" qof kasta oo nool wuxuu leeyahay choice "Ikhyaar" uu ku doorto wanaag & xumaan, xalaal iyo xaaraan, ha ahaado maskiin, mid xoogan, faqiir ama taajir. Marnaba ma aha qofka in baahi ama dhereg, hadba tii soo Marta, meel xun ku hogaamiso.

Madaxweyne Farmaajo wuxuu yiri, "Gaajo Gobanimo leh ayaa ka Roon Dhereg Gunnimo leh"

Allaha naga dhigo kuwi quuta Xalaasha, naftooda iyo qoyskoodana ka ilaaliya Xaaraan

Sadaqadii Lagu Bogsaday:

ALLE KA SAKOW MISKIINAD AY CAAWISAY AYAY XANUUN HAYEY KAGA BOGSATAY

Gabar u dhalatay dalka Indoniisiya oo ka mid aheyd haweenka ka shaqeeya guryaha ay leeyihiin qoysaska dalka Sacuudiga ayaa waxaa dhacday in mar kasta oo ay gasho suuliga ama musqusha lagu mayrto ama lagu qubeysto ayey aad ugu raagi jirtay ama ugu daahi jirtey. Dabeedna haweenaydii ay u shaqeynaysay ee guriga lahayd ayaa markii ay aad uga yaabtay weydiisay sababta ay ugu raagto musqusha ama suuliga?

Gabadhii shaqaalaha ahayd ayaa bilowday oohin muddo ayeyna kala joojin weyday. Markaasaa haweenaydii qoyska weydiisay sababta ay la ooyayso. Dabeedna gabadhii Jaariyada ama shaqaalaha aheyd ayaa ku jawaabtay sidan:

“Labaatan maalmood ka hor ayaan wiil umalay, ka dibna xafiiska dalkayga hooyo ee Indoniisiya ee shaqo geynta oo aan hore codsi u geystay ayaa ila soo xiriirey in ay shaqo iiga hayaan Sacuudiga, sidaasina ayaa halkan ku imi, markaa naasahayga caanihii ka buuxay ayaan ka khafiifiya.

Haweenaydii aqalka ama guriga laheyd ayaa aad uga danqatay una naxday waxayna markiiba ku tiri “ku noqo dalkaagii waxaan ku siinaya lacagta tikidhka aad ku dhoofayso iyo mushaarkaaga iyo weliba labada sanadood ee aad naaska nuujinayso wiilka yar ee aad dhashay, marka ay hawshaas kuusoo dhamaato nagu soo noqo aniga ayaa shaqada ku haynayee, telefoonkii ayayna u qortay”. Sidaas ayeyna ku fasaxday.

Waxaa hadaba dhacday in haweenaydii sacuudiga u dhalatay ay maalmo ka dib aadey ama tagtay balan ay la lahayd Nin dhakhtar ah si uu eego heerka uu marayo cudurka Kansarka oo hayay. Laakiin baaritaan uu sameeyey dhakhtarku waxba wuu ka waayay, markaasi ayuu misana ku celiyay waxaana uu ogaaday in heerka kansarka haweenayda uu taagan yahay 0%, isagoo saaray dhamaan qalabkii lagu eegayay.

Markii uu ogaaday isaga iyo dhakhaatiirta kaleba in ay bogsatay ayuu weydiiyay dawada ay qaadatay waxaana ay ugu jawaabtay xadiiska Rasuulka (scw) ee ah **“Bukaankiina ku bogsiiya sadaqo”**.

Hadaba walaal dhacdadan waxa ay Ina tusaysaa in ay muhiim tahay in aanu isu naxariisano, is kaalmeyno oo is caawino si aad u weyna aan ugu dadaalno Sadaqada.

Weligaa Ha Niyad Jebin:

Nin la yiraahdo Stephen King oo u dhashey dalka Mareykanka ayaa waxuu ahaa macalin dhiga Iskuul ku yaala meel miyi ah oo ka tirsan Gobolka Maine ee dalka Mareykanka waxaana kaloo uu aad u jeclaa inuu noqdo qoraa.

Mudo ka dib ayaa waxaa u suura gashey inuu qoro dhawr sheekooyin hase yeeshee Buuggiisii ugu horeeyey waxuu qorey Sannadkii 1973-kii waxaana uu ugu magac darey "Carrie" iyadoo markii uu diyaariyey ay diideen in ay daabacaan dhawr Madbacadood oo buugaagta daabaca, dabeedna aad ayuu u niyad jabay oo quustay waxaana Buuggii uu qorey ku tuurey qashinka.

Xaaskiisa oo arkeysay markii uu qashinka ku tuurayey Buuggii uu qorey ayaa isku soo uruurisay waxaana iyadoo niyada u dhisaysa oo dhiiri gelinaysa ninkeeda ay ku tiri sidan:

Gacaliye hadii dhawr jeer ay diideen Madbcadahu in ay daabacaan buugan ha niyad jebin ee mar kale u gee, dabeedna Stephen King isagoo niyada ay u dhisan tahay ayuu taladii xaaskiisa qaatey isagoo Buuggii Madbacad geeyey waana loo daabacay.

Haatan Stephen King waa mid ka mid ah qorayaasha caalamka ugu caansan Buugaagta uu qoreyna waa kuwa loogu iibsi badan yahay waxaana uu wax ka qoraa sheekooyin uu isagu alifo ee loo yaqaan "Novels"

Dulucda dhacdad ay ka hadlayso ama ay xambaarsantahay waxa ay tahay hadii dhibaatooyin kaa hor yimaadaan inaad weligaa niyad jebin sidoo kalena waa muhiim inaan is dhiiri gelinaa.

Odaygii Ceelku Ku Dumay:

Qoraaga la yiraahdo Muxammed Xasan Bin Cuqayl Muusa iyo Kitaabkiisa afka Carabiga ku qoran ee Al-Mukhtaar Al-Masuun Min Aclaami Alquruun ahna kitaab uu qisas iyo culuun farabadan ku ururiyey, ayaa waxaa ku jirta qiso aad u yaab badan oo ka dhacday Tuulo la yiraahdo Alxamrah. waxaana ay u dhacday sidan:

“Waxaa jiri jiray Nin beeraley ah oo ku noolaa magaalo la yiraahdo Alxamrah, waxaana uu ahaa Nin aad u Alle ka cabsi badan, sadaqaddana aad u bixiya sidoo kalana Masaajid ka dhisay degmadiisaa. Madaama oo xilliga uu ninkani jiray uu ahaa intii aan la helin Layrka ama korantada iyo guud ahaanba qalabka sida fudud wax loogu iftiinsho, waxaa uu ninkani habeen kasta masaajidkaas keeni jiray Faynuus lagu tukado iyo cashada ay isaga qoyskiisu ugu tala geleen, in haddii uu helo cid baahan oo uu ku sadaqaysto uuna siiyo, haddii kalana inta uu Masaajidka ku cuno uu salaadda ku sugo masaajidka.

Muddo ayuu ninkani dhaqankan ku dhaqmi jiray, kadib waxa dhacday abaar aad u ba’an oo baad iyo biyo la, aan badan keentay, waxaa gurey ceelashii biyaha, waxa ay abaartani wax yeello gaarsiisay beertii ninka odayga ah, maadaama oo uu gurey ceelkii beerta uu ka waraabin jiray.

Markii ay beertii oontay, ayaa odaygan iyo wiilashiisu ay go’aansadeen in ay qotaan ceel cusub bal si ay biyo uga raadiyaan. Muddo ayey ceelkan qodayeen oo hadba inyar ku darayeen iyaga oo naawilaya in haddii aanay quusan ay biyo ka heli doonaan. Nasiib darro ceelkii oo meel aad u fog maraya ayaa maalin maalmaha ka mid ah isku dumay iyada oo odaygii Alle ka cabsiga badnaa guntiisa ama halka ugu hooseysa ku jiro oo kalkiisa uu qodayey.

Innamadii ama wiilashii uu odaygu dhalay ee godka la qodayey oo bannaanka ka joogay markii uu dumay ayaa markiiba quustay, maadaama oo ay ogaayeen in dhererka xad dhaafka ah ee godkan arkayeenna sida uu isugu wada dumay. Waxa ay nafta ku qanciyeen in waxan ay qodayeenba ahaa xabaashiisii oo aanay ogeyn, jidka keliya ee u furanina uu yahay in aanay dib u soo faqin, si aanay uga calool xumaan burburka iyo goo’gaa maydkiiisa. Go’aanka ay wiilasha qaateen waxa uu noqday in aanay godkaas dib u qodin ee ay halkaas ku xabaalaan ama ku aasaan.

Markii uu ceelku dumay waxa uu odaygu ku jiray god yare hoose oo dhinac uga sii bayray daloolka weyn ee godka, kaas oo ay ogaan u duween, si ay u gaaraan jiho kale oo ay biyo ka filanayeen, nasiib wanaagna loox saarnaa dusha sare ee ceelka ayaa markii uu ceelku dumayey ku soo dhacay gudaha, waxa aanu isku daboolay afka godkii hoose ee uu odaygu ku jiray.

Intii aanu muddo badan ku jirin godkii ayaa waxa uu ninkii odayga ahaa arkay cid aanu arkayn oo u keentay isla faynuuskii uu gayn jiray masaajidka iyo cunto la moodo in ay tahay tii uu masjidka geyn jiray habeen kasta. Muddo lix sano ah ayaa uu ninkan Alle ka cabsiga lagu yaqaanay godkan hoostiisa ku noolaa isaga oo si joogto ah u hela cunto iyo biyo, ilayskii faynuuskkuna aanu mar keliya ka damin.

Lix sano markii ay geeridiisa ka soo wareegtay, abaartiina sii daba-dheeraatay ayaa wiilashii oo iyagu illaawayba geeridii, xanuunkeediina ka bogsaday waxa ay damceen in ay mar kale isku dayaan ceel qodis. Sahamin badan iyo meelo kala duwan oo ay tijaabiyeen kadibna waxa ay arkeen in ceelka biyo ugu dhowi uu ahaa kii ay qodeen ee ay markaas dareemayeen in ay qoyaankii biyaha gaareen. Haddii ay taladii rog-rogeenna waxa ay go'aansadeen in ay dib u qodaan ceelkii oo aabahood inta ay ka soo saaraan xabaal caadiya u sameeyaan ceelkana intifaacsadaan.

Waa ceel hore u qodmay oo ciiddii ku noqotay ayuunbaa dib loo soo gurayaa, sidaa awgeed dhib badan kalama ay kulmin in ay gaaraan halkii uu looxu isku daboolay, markii ay qaadeenna waxa ay ugu tageenba aabahood oo nool oo weliba xaalkiisa caafimaad iyo nololeedba fiican yihiin. Sidii ayaanu ku soo baxay muddo dambana sii noolaa, iyada oo ceelkiina uu noqday mid ay biyo ka heleen oo iyagii iyo beertoodiiba waraabiye.

Qisadani waxa ay tusaale fiican u tahay wanaagga sadaqadda oo laga yaabo in ay sabab u ahayd badbaadista odaygan, sidoo kale Alle ka cabsiga iyo salaadda ayaa iyaguna meesha ku jira.

Malabkii Gadmi Waayey:

Laba Nin oo kala lahaa laba dukaan oo jaar ama deris ah ayuu midkood iibin jiray malabka, Kan kale wax uu iibin jiray khalka dhanaan. Dadka ayaa aad u iibsana jiray khalka. Maalintii danbe ayuu ninkii lahaa dukaanka Malabka iibiya u qaatay in sababta ay dadku uga iibsana waayeen malabka ay tahay qiimaha qaaliga, sidaa darteedna wuu jebiyay ama raqiisiiyey qiimaha uu ku iibin jiray, ilaa uu gaarsiiyay qiimaha khalka uu ku iibiyo ninka haysta dukaanka ay deriska yahiin.

Laakiin markii u jebiyay qiimaha malabkana ma ay jirin wax iska bedelay weli sidii ayuu iska ahaa. Markii danbe ayuu u yimi ninkii ay jaarka ama deriska ahaayeen waxaana uu weydiiyay sababta ay dadku uga iibsana waayeen malabka macaan ee ay isaga uga iibsanaayaan khalka dhanaan ee aan lahayn macaanka.

Ninkii ayaa Waxuu uu ugu jawaabay “Anigu carrab malab ah ayaan ku iibiyaa khalka, adiguna carab khal oo dhanaan ah ayaad ku iibisaa Malabka”.

Hadaba xikmada sheekadan waxa ay tahay in dadka waxa qanciya ay yahiin dhaqanka qofka ee Maaha badeecadda uu iibinayo. Waxaana halkaasi inooga cad in dadku ay baahi u qabaan hadal malab ah oo run kuna dhisan niyad wanaagsan iyo qalbi saafi ahina ku lamaan yahay.

Madaxweynihii Lixaadka la'aa

Lenin Moreno Oo Ah Nin Naafo ah Hankiisa Sare Waxuu Gaarsiiyey in Loo Doorto Madaxweynaha Cusub Ee Dalka Ecuador.

Lenin oo da'diisu ay 64 sano jir tahay ayaa 20 sano ka hor uu qaarka dambe bakhtiyey kadib markii xabbad kaga dhacday labada lugood oo neerfayaasha dhaawacday ay naafo u horseedday, xilli ay kooxo burcad ahi isku dayayeen in ay boobaan dukaan ay isaga iyo xaaskiisu wax ka iibsanayeen.

In kasta oo uu soo maray xaalad adag oo caafimaad, aakhirkii waa uu bogsaday waxa aanu go'aansaday in aanay naafonimadu noqon dhammaadka noloshiisa, isaga oo qoray qiyaas 10 buug oo dhammaantood uu siyaabo kala duwan uga hadlayo dhiirrigelinta dadka iyo in niyadwanaagga aan laga tegin. Lenin Moreno waxa uu hore u ahaan jiray ergayga qaramada midoobey ee arrimaha naafada, ka hor intii aanu u go'in dhinaca siyaasadda.

Madaxweyne Lenin Moreno ma noqonayo hoggamaiyihii ugu horreeyey ee isaga oo naafo ah qabta xilka madaxnimo ee dalkiisa. Madaxweynihii 32-naad ee Maraykanka Franklin Roosevelt ayaa isna sidan oo kale ahaa naafo ku dhaqdhaqaaqa gaari curyaan, kadib markii isaga oo carruur ah uu ku naafoobay cudurka dabaysha, waxa aanu ka mid yahay madaxweyneyaasha taariikhda fiican ku leh dalkaas oo aad loogu bogaadiyo sidii uu dalkiisa ugala dabbaashay dhaqaale xumo badan oo jirtay iyo dhibaataadii dagaalkii labaad ee adduunka.

Madaxweynaha la doortay ee Ecuador ayaa isla markii xilka loo doortay waxaa dhambaallo hambalyo ah oo tiro badan u soo diray hay'adaha arrimaha naafada ka shaqeeya ee daafaha dunida.

Si kataba ha ahaato ee Lenin Moreno kuma cusba mansabka siyaasadeed oo muddadii u dhexeysay Sannadihii 2007 illaa 2013 waxa uu noqday madaxweyne ku xigeenka Ecuador, waxa aana lagu xasuustaa sidii uu muddadaas isaga xil saaray wanaajinta nolosha dadka naafada ah ee dalkiisa.

Nin Aan Gabadh U Dhalan Waa Gablan:

Waxaa jiray laba Nin oo ilma adeer labaad ahaa oo soo wada koray Laakiin Markii danbe aduunka ninba meel kariday waxa ay kuwada dhasheen kuna wada koreen gobol ka mid ah gobolada Soomaaliya.

Mudo dheer ka dib labadii nin waxa ay noqdeen rag waayeel ah waxaana dhacday in labadooda iyagoon is ogeyn ayaa xanuun loo wada keenay Cusbitaalka Digfeer ee Magaalada Muqdisho, dabeedna Meeshii ayey isku arkeen waa ayna is nabdeeyen mudo kadib ayeyna iska wareysteen waayahooda iyadoo mid ka mid ah labada oday uu dhalay 14 wiil oo waliba bulshada ka tilmaaman dhaqaale ahaana ladan iyo hal gabar oo iyadoo yar ka saqiirtay.

Odaygii kalena waxaa u dhalatay 7 gabdhood oo markii ay qaan gaareen xaasas noqday waxaana ragga qaba ee ay u dhaxeen ay isugu jireen, qaar aan hanti ahaan aan ladnayn iyo qaar iska dabaqada dhaxe ah oo iska roon.

Raggii Markii ay sidaas aqbaarta u kala qaateen ayaa ninkii wiilasha Alle siiyey ee uu u hibeeyay ayaa waxuu ninkii kale ku yiri ninyahow hada ma gablan ayaad ku baxeysaa oo ku dhiman rabtaa? Isagoo ula jeeda wiil la'aan miyaad dhiman rabtaa.

Ninkii gabdhaha dhalay ayaa Markiiba kii kale u jawaabay isagoo ku yiri gablan kii'ah labadeena waqtiga ayaa sheegi doona Insha Allah, dabeedna Kii wiilasha dhalay ayaa si yasmaleh Madaxa u luxay.

Mudo Markii la wada joogay ayaa kii wiilasha ILLAAHAY siiyay hadba wiil uu u yimaadaa oo lacag aad u fara badan ayuu odayga ku ak tuuraa kadibna kasii cararaa Una sheegaa in uu shaqo badan leeyahay isagoo ku qanciya Aabe bari ayaan kuu imanayaa dharkaagii aan dhaqida u qaaday saakay waan soo hilmaamay inaan kuu keeno Laakiin bari ayaan hore usoo qaadayaa Insha allah.

Kii gabadhaha ALLE siiyayne waxaa hadba gabar iyadoo la joogta ayaa kuwa kalane yimaadan Madaxa ayaa loo saliideyaa dharka ayaa laga badalaa sacad saacad waana loo mayraa ama loo qubeeyaa iyadoo jirkiisa meel walba oo ka mida ah ay noqotay meel dhalaaleysa oo laga subkan karo daryeel fiicana inuu heysto ayaa ka muuqatay.

Galabtii ayaa waxaa jirtay meel ay isugu yimaadaan dadka roon oo Cisbitaalka ku jira meeshaas oo lagu casiriyen jiray maalin walba odaygii gabdhaha dhalay isagoo dadka ka arag iyo dhar nadiifsan ayuu yimaadaa kii wiilasha dhalayna isagoo boorkii shalay meesha ka raacay wali saaran yahay ayuu galabta xigtana yimaadaa.

Maalintii danbe ayuu odaygii la hadlay gabdhahiisa waxuuna u sheegay in ninkaan uu Adeerkod yahay meeshana daryeel la'aan ay ku heysato marka Aabe caawiya oo gogosha iyo dharkaba ka badala oo nadiifiya ayuu ku yiri.

Maalinkii dambe Markii ninkii wiilasha ku faanayey la soo nadiifiyey ayaa meeshii casiriyada soo wada fariisten ayaa waxaa odaygii gabdhaha dhalay uu yiri Ina adeerow labadeena yaa gablana ah, dabeedna odaygii inta uu madaxa kil kilay ayaa ku jawaabay inuu ka qoomameynayo hadalkii uu horey u yiri.

Nuxurka sheekadan ayaa ah in hadba waxii EEBE ku siiyo aad ku mahdiso kuna qanacdo oo dadka kalena aadan caayin waayo qofba meel ayuu nusqaan ka yahay.

Nuurkii Hanuunka Ayaa Iftiimiyey Aqalkooda:

Waxaa ay qaateen risaaladii nebi Muxammad (NNKH). Xaqa had iyo goor dad baa ka xajiimooda, mana waayo duul xiqdi u qaada oo ka carooda ama ka xanaaqa. Waxaa iyada iyo ninkeeda soo foodsaaray culeys iyo cagajugleyn uga imanaysay nimankii Qureysheed ee markaas magaalada Makka ugu tun roonaa. Waxay ka mid ahaayeen qoysas badan oo Muslimiin ah oo cadaadis kala kulmayay nimankaas. Xagga dhibka waxay deris ka ahaayeen reer Cumayr oo ay duruusta tacaddiga wada naqtiimeen.

Dhib oo dhan dheef iyo dhereg baa ka dambeysa, Ebbena mar walba waa wanaajiyaa cirib-dambeedka addoomihiisa wanaagsan. Qoyskaas waxaa u furmay albaabada baraaraha iyo barwaaqada, waa se waxaan lagu waari doonin e, seygi ayaa geeriyooday, iyadina waxay noqotay Carmal uu ciilay waayuhu, oo gacaliyaheedii god kaga qariyay. **Nebiga (NNKH)** ayaa amray in ay ku ducaysato ducadan soo socota: "اللهم أجرنى في مصبتي واخلفني خيرا منها" oo macnaheedu yahay

"Ilaahow musiibadan iga ajar sii, wax ka khayr roonna iigu beddel", Ducada kadib ayayse is weydiisay "Toloow waa kuma ninka gacaliyahaaga ka wanaagsanaan Kara?"

Muddo markii la joogay, waxaa soo doonay oo guur u soo bandhigay Nin ka khayr badan xabiibkeedii hore. Waxa ay noqotay mid ka mid ah xaasaska Nebiga (scw). Waxay noqotay hooyada mu'miniinta.

Umu Salama Ilaahay ka raalli noqdo iyada iyo abuu Salama ba e, waxay tiri hadal nuxurkiisu ahaa "Ducadaydi waa la ii aqbalay oo Nin abuu Salama ka wanaagsan baan ku helay"

15 jirkeedii bay la aqalgashay wiil ay is calmadeen, wax yar ka dibna waa uu ka geeriyooday. Ma quusan e, mar kale ayay sugtay calafkeeda oo sheeko la gorfeysay geyaankeeda. Waxay is guursadeen Nin kale, nasiibdarro, isagina tiisii ayaa soo dhammaatay (Warar ayaa sheega in ay ninkaas dambe ka la tageen).

Iyada oo Afartan jir ah ayaa waxaa guursanaya ninka ugu khayr badan dunida, ninkii ay dabeecaddiisa ka heshay, Aaminkii, runlowga ahaa, macallinkii basharka---- Nebi Muxammad (NNKH). Waxay noqotay hooyadii mu'iniinta. Waxaa magaceeda la yiraahdaa Khadija bintu Khuweylid Ilaahay ha ka raalli noqdee.

Gabaryahay, haddii aad si UN weydo xabiibkaaga (dhimasho ama furniin), iska ilaali in ay quustu kuu kaxayso qolalka murugada, kana dheeroow in aad ka tanaasusho farxadda iyo fursadaha nolosha. Eebbe weyne waxa uu ballan qaaday in culeys kasta uu ka dambayn doono fudayd.

Ha niyad jabin, nuurkana ha iska naaqusin. Ha quusan hana qarracmin. Si walba oo aad marmar badan jallaafooyin ugala kulanto maqaadiirta, waxaa laga yaabaa in khayr aad haysato uu kaa horjoogo wax ka sii khayr badan oo markaas Eebbe kaa qaado shaygaas aad haysato, si uu kuu la kulansiyo mid ka wacan. Dedaal oo adkaysina raaci. Waa la doogiye, yaan la dacaroon.

Qofka Muuminka Ah waa in uu ku Qanco Wixii Alle U Qoro:

Nin shaqaale ah oo uu aad u hooseeyay mushaharkiisu, misana shaqo wacan aan daalin oo si fiican u gutta waajibkiisa shaqo ayaa jirey, wuxuuna ninkaasi masuul ka ahaa walaaladii hooyadii iyo caruurtiisa.

Hadaba maalin ka mid ah maalmaha ayuu shaqadii ka maqnaaday markaas ayaa ninkii uu u shaqayn jiray naftiisa ku yiri Allaylehe ninkaasi Nin shaqo wacan buu ahaa mushaharkuna kuma filna ee aan u kordhiyo, subixii danbe markii uu shaqadii yimi ayuu ninkii uu u shaqayn jiray siiyey musharkiisii oo waxoogaa uu ugu kordhiyey! Ninkii shaqaalaha ahaa muu ku amaanin ficilkaas ninkii uu u shaqayn jiray ee shaqadiisii ayuu iska sii watay!

Mudo ka dib ayuu hadana maalin kale ka maqnaaday shaqadii, ninkii uu u shaqayn jiray ayaa carooday ama xanaaqey waxaana uu yiri: balan Illaah waxaan ku qaaday inaan ka jaro intii aan u kordhiyey!

Markii uu ka jaray intii uu u kordhiyeyna ninkii shaqaalaha ahaa Kama murmin ee shaqadiisii ayuu iska sii wattay!

Ninkii taajirka ahaa ayaa yaabay oo waydiiyey ninkii shaqaalaha ahaa: war heedhe maalintii horena mushahar ayaan kuu kordhiyey oo kumaad farxin, maantana waan kaa jaray oo kumaad caroone BAL ii waran?

Ninkii shaqaalaha ahaa ayaa yiri: maalintii hore ee aan maqnay xaaskayga ayaa wiil ii dhashay oo aan ku mashquulsanaa, markii aan soo noqdee aad mushaharka ii kordhisayna waxaan iri wiilkii ku dhashay rizaqaadiisa weeye oo Illaah kuu diyaariyey!

Maalintii danbe ee aan maqnaana iskama maqnayne Hooyaday ayaa geeriyootay ama dhimatay! Markii aan soo noqdee aad iga jartay Mushaharkana adigoo caraysan waxaan iri: hooyo way dhimatay oo mushaharkaas kaa go'ayna wax kale maaha ee Rizaadeedii ayaa go'ay! Markaasaa ninkii taajirka ahaa aad uga murugooday qisaska uu uga sheekeyeey ninkani.

Hadaba walaal tani waxay inoo sheegaysaa in qofka muuminka ah uu ku qanco wixii Illaah u qoro una garto Naftuna waa damaaciyad ee qanaacada aan ogaano.

Garasha La, aanta Nimcada Eebbe.

Marbaa waxaa dhacday in Nin odey ah oo 70 jir ah uu xanuunsaday oo kaadidii ay ku dhegtay, dabeedna Cusbitaal ayaa la geeyay dhakhaatiirtii ayaana u Sheegtay inuu u baahan yahay Qaliin deg deg ah in lagu sameeyo.

Ninkii odeyga ahaa Qaliinkii ayuu aqbalay maadaama xanuun badan uu dareemayey.

Hadaba waxaa dhacday in markii qaliinkii lagu guuleystay ee loo dhameeyay ayuu dhakhtarkii waxuu ku soo dalacay Lacagtii.

Ninkii odeyga ahaa ayaa aad ula yaabay lacagta Biilka lagu soo dalacey, ka dibna waxuu bilaabay inuu aad U Ooyo. Dhakhtarkii markuu arkay Odaygii oo Ilmeynaya ama Oynaya ayuu u sheegay in Lacag hadii uusan haysan laga Sugi karo, balse Ninkii ayaa ku jawaabay: - Lama Ooynayo in ay Lacagta badan tahay darteed. Balse Waxaan la Oynayaa, Garasha La'aanta Nimcada EEBE. 70 sannadood ayuu ILLAAHEY Kaadi iga Keenayay, Hal marna Lacag iguma soo Dalicin, balse Bina'aadam, Hal mar oo qura ayuu wax ii qabtay, Lacagna wuu igu soo Dalacay.

Walaal Nimcooyinka aan xadka laheyn ee Alle Ina siiyey ee uu inagu galadeystay aanu ku mahdino waqti kasta.

Sawjadii Cabashada Ku Noolayd:

Meel ka mid ah dalka Masar ayaa waxaa jiri jirtay inan ama gabar yar oo agoon ahayd oo hooyadeed ay ahayd cidda keliya ee adduunka u joogta, dabeedna waxaa guursaday Nin Ina' adeerkeed ah. Laakiin waxa uu ku noqday Nin qallafsan oo dulmi badan u geystay, isaga iyo ehelkiisuba ayaa waxa ay xumeeyeen inantii oo ay ula macaamileen sida adeegto ama jaariyad iyaga u shaqaysa.

Waxaa u dheeraa aflagaado iyo gacan ka hadal badan. qisadan oo uu qorey wargeyska Al-Jamhuuriya ee ka soo baxa dalka Masar waxa ay intaas ku dartay, Inantani ama gabadhani marka ay dareento in dulqaadkii iyo adkaysigii ka dhammaanayaba waxa ay tegi jirtay halka ay adduunyada ugu jeclayd oo ahayd guriga hooyadeed waxaana ay ku seexan jirtey dhabta hooyadeed, si ay maalintaa ugu soo nafisto, naftana u tusto in ay jirto cid ay agteeda qiimo ku leedahay. Hooyadeed oo taag darrada da'da ay u raacday xanuunka dayaca ku helay waxa ay arkaysay in aanu u furnayn jid kale oo aan ahayn in ay gabadheedu ku waaniso in ay gurigeeda iska haysato Alle hortiina ugu samirto ninkeeda ama saygeeda.

Toban sano oo xaalku sidaa ahaa kadib, hooyadii waa ay geeriyootay, inantiina waxaa u dumay gabbal kale oo madow waxa ay weyday xitaa halkii ay ku nafisi jirtay ee calool xumada ka buuxda uga caban jirtay.

Waxa se' dhacday in hooyadan oo ahayd qof cibaado badani ay inanteeda u sii dardaarantay arrin cajiib leh, waxaana ay ku tiri "Hooyo haddii adduunyadu kugu ciriiri noqoto oo aad weydo cid aad u cabato, qolkaygan kaalay oo sijaayaddaydaas ama saligaas ku tuko, oo Alle halkaas ku bari, isagana u cabo" Sidii ayey gabadhii yeeshay oo toddobaad kasta hal maalin ayaa inta ay qaadata caagad biyo ah oo weyso iyo cabbitaan ay ka dhigato, ay tegi jirtay qolkii cidlada ahaa ee hooyadeed ka dhimatay oo ku soo ducaysan jirtay.

War xumo tashiil iyo ruux wanaagga dadka ka naxaa abidkiiba waa uu jiray ee markiiba dad baa u yimi ninkii oo weydiyey sababta xaaskiisu ay toddobaad kasta mar u baxdo iyada oo biyo sidata, in badan kadibna soo noqoto iyada oo sidata caagaddii oo maran oo ebar ah. Isna ma hubsade ayuu noqday oo markiiba waxaa galay tuhun iyo hinaase ama maseyr aan meesha le'ekayn. Markii uu dabagalayna waxa uu ogaaday in ay tagto qolkan, sidaa awgeed si uu u ogaado cidda uu is leeyahay gudaha qolka cidlada ah ayaa ay u sii joogtaa ama ugu timaaddaa ayuu maalinkii dambe qolkii goor hore yimid oo meel ka mid ah isku qariyey isaga oo sugaya xaaskiisa uu ka soo dheereeyey markay gurigii ka soo baxaysay iyo ninka uu is leeyahay waa uu u iman doonaa.

Gabadhii qolkii ayaa ay timid oo inta ay weyso qaadatay biyihii u hareyna agteeda dhigtay ayaa ay sijaayad duug ah la soo baxday oo ay salaad tukatay. Kadib waxa ay akhriday duco dheer oo iyada oo ilmaynaysa ay Alle uga cabanayso culayska uu ninkeedu ku hayo, balse sheegaysa in ay jeceshay oo ay **Alle (SWT)** ka baryeyso in waa uu awoodaa ee u soo hadeeyo.

Ninkii oo aan ka dheerayn, aadna uga damqaday cabashada tirada badan ee uu ogyahay in ay run tahay ee ay xaaskiisu Alle la hortagtay iyo haddana wanaagga ay ugu ducaynayso ayaa isaga oo ilmaynaya markii ay salaaddii ka baxday uu isku duubay oo madaxa iyo minjaha qaaday ama ka dhunkadey, waxuuna wacad ku maray in dib aanu il qalloocda ugu eegin.

Maalinkaas sidii ay isugu ooyayeen ayaa gabbal u dumay waxaana ay go'aansadeen in ay qolkan karaamaysan ee Alle isugu hadeeyey u hoydaan. Waxa se' dhacday arrin kale oo dareenka taabanaysa, waxa ay gabadhii ku riyootay, qof aanay arkayn oo inta uu u yimid ku leh, "Toban sano ayaa aad u cabanaysay dadka qofkii kuugu dhowaa, waxba se kuma' uu tarin. Bil keliyana waxa aad u cabatay Ilaahay, (SWT) markaasuu xaalkaagii oo dhan beddelay."

Liibaanta Sadaqada:

Wakhtigii **Nabi muuse (CS)** ayaa waxaa jiray qoys faqiir ama sabool ahaa oo ku noolaa nolol adag oo ciriiriya sannado badan ayay sidaa ahaayeen. Waxay nololasha la halgamaanba oo ay samir iyo adkaysi ku noolaadaanba. Habeen ka mid ah habeenada ayaa ninkii iyo xaaskiisa oo furaashkoodii fadhiya waxay waydiisay odaygeedii "miyaanu **Muuse (CS)** ahayn **nabigii** iyo Kii **Allah** sida tooska ula hadla" wuxuu ugu jawaabay "haa wuu yahay" waxay tiri "maxaad ugu tagi wayday oo aad arinkeena ugu sheegi wayday ood uga dalbi wayday inuu **Alle** inoola hadlo oo uu inoo waydiiyo inuu Taajiriin inaga dhigo si aynu inta nolosha inooga dhiman ugu noolaano farxad, baraare iyo nolol qurux badan"

Wuxuu yiri “waayahay marwo waan u tagayaa waanan u soo bandhigayaa arinkeena” kadib subaxdii ayuu u tagay **nabi Muuse (CS)** waxaanu uga waramay xaalkooda nolololeed waxaanu ka soo dalbaday inuu **Alle** ula hadlo oo inuu Tujaar ka dhigo.

Kadib Nabi Muuse (CS) waa uu u tagay si uu ula hadlo Alle oo ugu bandhigo xaalka qoyskan faqiirka ah Alle ayaa ah mid cid kasta Maqla arkana’e oo aanu shayna ka qarsoomi karine. Kadib Alle sareeye wuxuu ku yiri nabi muuse (CS) **“U Sheeg Inaan Iyaga Tujaar Ka Dhigayo Fadligayga Dartiis Laakiin**

Waa Hal Sano Oo Kaliya, Sannad Kadib Ayay Sidoodi S00 Noon Doonaan” kadib **Nabi Muse** waa uu u tagay qoyskii waana u bushaarayeen in **Alle** SW ka aqbalay Ducadoodii laakiin ay sannad kaliya Tujaar ahaanayaan.

Kadib ninkii iyo xaaskiisa waxay farheen farxad aad u wayn kadibna **Alle SW** waxuu badalay noloshoodii hore waxaanu ka arsaaday meel aanay ogayn waxaanay mudo kadib noqdeen Tujaar. Noloshoodii waa ay is badashay waxaanay noqdeen qaar farxad iyo damaashaad ku nool. Kadib haweenaydii caqliga wanaagsanayd ayaa ku tiri odaygeedii “Gacaliye sow ma ogid inaan noloshaan ku noolaanayno sannad kaliya kadibna aan Fuqaro ku noqonayno” ninkii wuxuu yiri “ haa waan ogahay” kadib ayay gabadhii baarida ahayd waxay tiri “hadaba hantidan **Alle** ina siiyay aynu kaga faa’iidsano inaynu caawino bulshada deegaankeena ku nool si markaynu Fuqaro noqono sannad kadib ay iyaguna inoo caawiyaan oo ay u gudaan abaalka aynu u galnay inaguna aynaan u tuugsan iyaga” ninkii wuxuu yiri “waad asiibtay Gacalisoo”

Kadib waxay bilaabeen inay dhisaan guri ka Ag dhaw wado ay dadka musaafiriintii maraan waxaana ay albaabka guriga u jeediyeen xaga wadada, waxaana tuuladooda ku yaalay todoba wado oo laga soo galo, iyaguna waxay sameeyeen todoba albaab oo laga soo galo guriga.

Ninka iyo xaaskiisa waxa ay guriga ku samayn jireen cunto habeen iyo maalinba si dadka musaafiriinta ahi uga cunteeyeen, waxay sidaa ahaataba wakhtigu is guraba iyadoo **Nabi Muusena CS** uu dusha kala socdo xaalka qoyskan ayaa waxa dhamaaday sannadkii **Alle SW** ugu tala galay inuu reerkani Tujaar ahaado.

Qoyskiina waxay ilaabeen sannadkii **Alle** ugu xadeeyay maadaama ay iyagu (Ninka iyo Gabadhu) ku mashquuleen cunta karinta iyo siinta dadka martida ah ee tuuladani yimaada waxaan soo galay sanadkii labaad iyaguna wali sidii ayay Tujaar u yihiin oo u caawiyaan dadka Socotada ah.

Nabi Muuse CS ayaa yaabay waaxnu la hadlay **Alle** waxaanu ku yiri **“Rabigayoow waxaad ugu talagasahay qoyskan inay sannad kaliya Tujaar ahaadaan imikana sannadkii labaad ayay wali Tujaar yihiin waa maxay sababtu?”** Allah SW ayaa ugu jawaabay **“Muusow Waxaan U Furay Albaab Ka Mida Albaabada Risqiga Iyaguna Waxay Fureen Todoba Albaab Oo Ay Ku Arsaaqayaan Adoomahayga Muusow Waan Ka Xishooday Aniguna Inaan Dib Ugu Cliyo Noloshoodi Faqriga Ee Adkeyd”**

Alle ayaa xuma oo

dhan ka nasahan sadaqadu waa shay qaaliya oo laga dheefo faa’iidooyin badan Aduunyada iyo Aakhiradaba, Sadaqadu maalka waxba Kama nusqaamiso ee waabay baraykaasaaba.

Walaal aynu wax is tarno oo caawino keena dhibaataysan si dhamaanteenba **Alle** inoogu naxariisto oo Raxmadiisa iyo Naxariistiisa balaaran inoogu shubo.

Damaqashadii Manjhi:

Nin Mudo 20 Sannadood Ka Badan Keligii Qodayey Buur Weyn Si Uu u Sameeyo Jid Gawaarida Ay Maraan!!

Nin la yiraahdo **Dashrath Manjhi** oo u dhashay dalka Hindiya ayaa waxa uu qodayay keligii god weyn oo buur ku yaalla muddo labaatan iyo laba GU' ama sannadood ah. Jid in uu ka sameeyo ayaa waxa ku kallifay ayaa cajiib ahayd. Xaaskiisii uu jeclaa ayaa u dhimatay dhaawac ka soo gaaray shil, halkaasna ay ugu naf baxday dayac dartii, oo ay u weynayd waddo-xumo deegaankaa haysatay. Si aanay haweenay danbe u Marin halkii ay martay xaaskiisu ayaa uu sidaa u sameeyay Dashrath Manjhi.

Maaddaama uu dhulku buurallay yahay, degmada ugu dhaw ee goob caafimaad leh waa in loo sii lugeeyo 55 (konton iyo Shan) kiiloomitir oo RAF ah. Sidan lama uu Rabin oday **Manjhi** in ay u silcaan dadka tuulada deggani.

Sannadihii **1959**-kii ilaa **1982**-kii ayaa uu wadey qodidda Marin ama wado buurka kala barta oo dadku isticmaali karaan. **110** (boqol iyo toban) mitir oo dherer ah, iyo sagaal mitir oo ballac ah, ayuu qodayay ninkani.

Soddon sanno oo dheeraad ah ayey dawladdu halkii ka sii amba qaadday oo ay sii ballaarisay, si ay u soo baxdo waddo la adeegsan karo. Dadka deegaanku waxa ay u arkayeen Nin waalan oo ay saamaysay dhimashada xaaskiisii oo lagu magacaabi jirey **Falguni**. Waa haweenaydiisii dacdarrada u xijaabatay. Balse, aakhirii waa ay ka garaabeen in uu ka talinayay aayahooda! 55-kii kiiloomitir waxa uu ku soo gaabiyey 15 kiiloomitir.

Gu'gii ama Sannadkii **2007** ayuu kansar dartii u geeriyooday oday **Manjhi**. Tacsii iyo aas qaran ayaana loo sameeyay.

Sheekada ninkan odayga ah ayaa soo jiidatay indhaha dadka daneeya arrimahan. Waana ta sababtay in filim Bollywood ah laga sameeyo qisada ninkan. Ogos sannadkii **2012** ayaa la soo bandhigay filimka **Manjhi: The Mountain Man** oo laga jilay sheekadan **Dashrath Manjhi**.

Waxa aan u socday haddaba, maxaa laga baran karaa dhacdadaa naf hurnimada ah ee uu sameeyay **Manjhi**? (Maxaad ku daraysaa akhriste qodobbadan hoose?).

- Baahidu haddii ay ahayd hooyada hal-curinta, ogobeey damqashaduna waxa ay noqonaysaa hooyada diir-naxa. Oday **Manjhi** uma uu qodin buurta baahi u geysay darteed, oo xaaskiisiiba waa tii hoyatay. Taa beddelkeeda waxa ku qaaday damqashada ka soo gaartay sida ay u dhimatay ooridiisii oo keentay in uu u diir naxo ummadda aan weli silicaa arag.

- Haddii qofi hawl u kaco, hawl ka go'naani weheliso, waxa la arkaa in uu ka mira-dhaliyo.

- Shaqada aad adigu bilawdid qasab ma aha in aad isla adigu dhammaystirtid, balse waxaa qasab ah uun in aanad dayacin oo aanad bartanka kaga dhaqaaqin. Oday **Manjhi** waxa uu bilaabay qodidda buurta, balse dhammaadkii waxa kala wareegtay oo jid cadde ka dhigtay goobtii dawladdii hoose.

- Ficillada khayriga ah ee qofku sameeyo, kana fog inta ay sawirtaan garaadka caadiga ah ee dadku, waxa ay keenaan in bulshadiisu mooddaba Nin wax ka si yihiin oo dawo u baahan. Waa taa qabsatay **Manjhi**. Talada halkan aynu isku siinaynaa waxa ay daaran tahay in aan la is dhiibin. Maaddama uu jiro wax kugu riixayay in aad hawshaa waddid, ha u oggalaan in ay yimaaddaan walxo kaa riixa sii wadidda hawshii.
- Weligaa shaqo aad qabatay ha u samayn si aad dadka uga heshid abaalgud. CEEB caleek!
- Dadnimadaadu mar kasta ha noqoto dunta dadka isku kiin xirta. **Manjhi** inta uu iska fadhiistay ma uu Oran maxaa iga galay haddiiba afadaydii dhimatay e, waa kii u kacay in uu dadka kale ka baajiyo in ay maraan wax yar oo la maarayn karo.
- Hankaaga ballaari, si waxa aad qaban kartaa u kordho. Iminka **Manjhi** waxa uu yoolkiisa ka dhigay in ummad dhan waddo u sameeyo. Hanashadiisana waxa ay noqotay mid ku SAR go'an hankiisii oo waa kaas ku guulaystay in la dhiso waddadii
- Mararka qaar ayaa ay far quri fool dhaqi kartaa e, haddii aad taageero weydid adiguna gacmaha ha laabanin.

Horumarkii Sunil Bharti:

Wiil Markii Uu Dhashay Dhakhtar Ku Yiri Mustaqbalka Wuxuu Noqon Doonaa Curyaan' Aragiisu Daciif Yahay' Maqalkiisu Liito Hase Yeeshe Intiiba Ma Noqon Wiilkii Wuuxuna Noqday Nin Horumar Weyn Nolosha Ka Sameeyay.

Markaan dhashay, hooyadey waxaa loo sheegay inaan lugaha curyaan ka noqon doono, hadalku i dhibi doono, arageygu daciifi doono, maqalkeygu liidan doono, mustaqbalkana aan kursi dushiis ku qaadan doono. Hooyadey iyo aabahay sidey ugu farxeen calool galkeyga iyo sidey u sugayeen dhalashadeyda in la mid ah ayey u murugodeen markii loo sheegay inaan xannuun ku dhashay.

Muddo kadib waxaan ku istaagay lugaheyga sida uu Alle qadarey. Afar sano kadib waxaa la i geeyey xannaano. Hooyo iyo aabe waxey isku dayeen in ay i baraan, nuuc kasta oo ciyaar ah, waxey iga sheekeyeen waxkasta oo xigmad leh, si ay u hubiyaan inuu garaadkeygu dhammeystiranyahay. 11 sano ka hor takhtarkii igu sheegay inaan hadli doonin, dhaqaaqi doonin, wax maqli doonin, maskaxdeyduu taam noqon doonin, wuxuu goobjoog ka noqday xaflad la igu abaal mariyey ardeyga ugu natiijada fiican iskuullada magaalada aan deggeneyn.

Fasalka lixaad markaan noqday waxaa la i xulay inaan ka mid noqdo naadiga kubadda cagta ee iskuulkeyga. Fasalka 7-aad waxaa la ii doortay Kaaba galaaska ama hor joogaha fasalkeyga, dugsiga sare intaan ku jiray seddex mar waxaan hormuud u ahaa ardeydii loo xulay in ay tartamada aqoonta, bannaanka iskuulka uga qeyb galaan.

Sannadkii kowaad ee jaamacadda shirkad ayaan u billaabay inaan xayeysiiska kala shaqeeyo, sannadkii labaad waxaan noqday guddoomiyaha midowga ardeyda jaamacadda, sannadkii seddexaad ee jaamacadda waxaan noqday guddoomiyaha garabka dhallinyarada xisbi mucaarad ah oo markaas dalka ka jiray, markaan jaamacadda dhammeeyey waxaa doorasho dalka ka dhacday ku guuleystay xisbigii aan ka tirsanaa, waxaana ka noqday wasiirka dhallinyarada iyo ciyaaraha. Haddana waxaan ahay aabaaha dhalay seddex carruur ah, qoraha labo buug, milkiilaha shirkadda is gaarsiinta ugu weyn dalka Hindiya ee Airtel iyadoo hantida aan leeyahay ay gaareysaa 14.75 Billion oo Dolar waxaanan ahey qofka sideedaad ee ugu taajirsan dalka Hindiya da'dayduna waa 59 jir.

Sannad kasta oo ka mida nolosheyda waxaan xaqiijiyeey Guul ILA eg" sidaas waxaa hadalkiisa kusoo GABA gabeeyey **Sunil Bharti Mittal**, oo ah milkiilaha Shirkadda Airtel.

Qofka Dulman Waxba Ma Ilaawo:

Al-ma'muun Bin Haaruun al-rashiid oo kamid ahaa khaliifadii soo maray dowladii cabaasiyiinta, ayaa xiligii caruur nimadiisi maalin macalinkii aad u garaacay iyada oo aysan wax sabab ah jirin.

Ma'muun waxaa uu weydiiyey: - macalin maxaad ii garaacaysaa?

Macalinkii waxa uu ugu hadal celiyey: - Aamus!!!!

Markasta **oo ma'muun** su'aal weydiiyo **macalinka** waxaa uu ugu jawaaba Aamus!!!!

Labaatan sannadood ka dib markii loo dhiibay khilaafada, wixii ugu horeeyey ee uu qabtay waxay ahayd in uu **macalinkii** u yeero, isaga oo waydiinaya.

Macalin maxaad ii garaaci jirtay waagan yaraa.

Macalinkii isaga oo dhoola cadaynaya ayuu ku yiri: - waa xasuus dheer, ma ilaawin miyaa?

Waxa uu yiri ma'muun:- ma'ilaawin, qalbigana Kama go'in.

Waxa uu yiri macalinkii: - waxa aan kuu garaacay in aad baratid in qofka dulman uu san waxba ilaawin.

Ha dulmin qofna waayo dulmigu waa holoc ka baxaya qalbiga qofka la dulmiyey kaas oo aan damayn xitaa hadii ay sannado badan ka soo wareegaan...hada ayaad u baahantahay inaad ka faa'iidsatid casharkii maalintaas...

Macalinku markasta waxa uu ku dadaala sidii uu kuu Bari lahaa casharo aad ku hagi kartid noloshaada....

Hadii Aad Is Moodo Inaad Dadka Ugu Caqli badan tahay Ogow in Ay Jiraan Dad ka Caqli badan:

Waxaa jiray nin ganacsade hantiile ahaa oo safar badnaa, maalin maalmaha ka mid ah ayaa wuxuu aaday bangi ka mid ah bangiyada ku yaala magaaladii uu daganaa si uu ugasoo deynsado lacag shan kun oo dolar ah si uu ugu safro, balse bangigii wuxuu ka dalbaday damaanad in uu keeno si loo siiyo lacagtaa, ganacsadihii wuxu geeyay gaari uu lahaa oo qiimo ahaan joogay shan iyo labaatan kun oo dolar, sidaasana lacagtii deynta aheyd ayaa lagu siiyey, hase yeeshee waxaa amankaag ku noqotay maamulihii bangiga iyo shaqaalahiiba ninkan hantiilaha ah gaarigiisana qiimahaas joogo sababta ku kaliftay shan kun in uu deynsado, waxeyna ka dhigteen maadeys iyo in ganacsaduhu wax ka qaldanyihiin.

Labo usbuuc ama laba todobaad kadib ayuu so celiyey shantii Kun iyo faa'iidadii bangiga oo aheyd 41\$ dolar. Maamulihii bangiga ayaa weydiiyey sababta ku kaliftay isagoo hantidaan leh in uu Shan Kun deynsado gaarigiisa qaaliga ahna damaanad ahaan u dhigto.

Wuxuu ku jawaabay ganacsadihii "Magaalada aan ku noolnahay ma jirtaa meel gaarigaagu uu ku nabad galayo mudo labo isbuuc ah ijaarka laga qaadayana ay tahay 41 dolar oo kaliya?

Marka ujeedkeyga ma aheyn shanta Kun balse waxey aheyd sidii uu gaariga iigu nabad gali lahaa lacag badanna aan leyga qaadin inta aan safarka ku maqanahay.

#Xikamada sheekadu waxa ay tahay

Hadii aad is moodo inaad dadka ugu caqli badantahay ogow in ay jiraan dad ka caqli badan.

Cilmigii Oday Qufaal

Qufaal Nin la Oran jiray oo ka mid ahaa fuqahadii waawaynayd ee Shaaficiyada, ayaa ka hor intaanu caalimka noqon, sida magaca uu Ulla baxayba, waxa uu ka shaqaysan jiray oo u samayn jiray **Qufullada**. Isagoo **qufalladisii** ka shaqaysanaya, ayaa waxa uu maalin sameeyay **quful** iyo **furre** wada socda oo miisaankoodu yar yahay oo fudud, aadna u cajiib badan.

Nin kale oo isna **Qufaal** la yiraahdo oo daris ama jaar la ahaa, ayaa waxa u isna sameeyay **quful** kaliya oo bila **furre** ah, miisaankiisuna wayn yahay. **Qufulkii** ninkan dambana waxa uu aad uga gadmay suuqii oo waa laga iibsaday.

Oday-gii hore ee **qufulka** yaraa sameeyey ee **Qufaal** isna la Oran jiray, ayaa dadkii suuqa la hadlay oo yiri " Sidee wax u jiraan, anniga quful iyo fure wada socda ayaan sameeyay oo waliba fudud, ninka kale ee **Qufaal** umbaa kisii cusla haddana la iibsanaya?"

Nin dadkii ka mid Ahaa ayaa ugu jawabayay, " Oday **Qufaallow**, qofku waxa uu caan ku noqdaa qalinka iyo aqoonta, qufulada laguma caan baxo. Ninkaa kale ee isna **Qufaal** la yiraahdo, wuu ka aqoon badan yahay, **qufulkiisana** waxa la socda aqoon oo waa Nin Fiqiga aad u yaqaan. Adna waxaad samaysay **quful** bilaa aqoon ah, marka aqoontisa ayaa lagu tix galinaya isaga, ee adiguna aqoon barro".

Odaygii **Qufaal**, xiligaa Da'diisu waxay ahayd **40** sanno jir. Waxaa uu go'aansaday in uu Cilmiga bilaabo. Cilmigii ayuu aad u bartay, 40-kii sanno ee hore **qufulle** ayuu haa, **40-kii** sanno ee dambana waxa uu noqday caalim fiqiga looga haray oo ilaa imika cilmigiisi laga faa'iidaysto. Ninkii kale wuu ka caan sanaaday. Magacii ay ninka kale ka sinayeen ee **qufulkisa** la lahaa aqoon ayaa la socota, isagii ayaaba ka magac dheeraaday oo bulshadii aad u baratay. Magacii ay wada waddaagi jireen ee '**Qufaal**' odaygii ayaa looga haray, markuu cilmigiisii batay.

Marka la magacaabay odaygii caalimka ahaa, waxa la yiraahdaa '**Qufaal**' halka ninkii kalena la raacin jiray **Qufaal Al-shaash**. Darajada intaa le'eg, Oday **Qufaal** waxa uu ku gaaray aqoonta uu bartay, balse kumuu gaarin **qufuladdii** uu ka shaqayn jiray.

Nolosha Boqortooyada Iyo Tan Qabriga:

Boqor la Oran jirey **Mutawakil** oo xukumayey dawladdii Cabbaasiyiinta qarnigii saddexaad ee hijriga bartankiisii ayaa waxaa loo soo sheegay in uu inqilaab ama afgambi soo wado **sheekh** la Oran jirey **Cali Alhaadi** oo ahaa durriyaddii **Cali bin Abii Daalib** oo deggenaa magaalada Saamaraa ee dalka Ciraaq.

Ninkii **boqorka** ahaa Ciidan ayuu u diray in ay soo qabtaan sheekha gurigiisana ka soo baaraan hub. Ciidankii ayaa gurigii xoog ku jebiyey waxayna u tageen **sheekhii** oo dhulka fadhiya qibladana u jeeda oo ducaysanaya gurigiina waxay ka heleen hal maro oo uu xirnaa iyo hal weel oo uu wax ku cuno keliya.

Waxay u keeneen **boqorkii** oo markaa **sharaab** cabaya. Waxayna u sheegeen waxay soo arkeen. **Boqorkii** ayaa koob **sharaab** ama cabitaan ah u soo taagay **sheekhii**, dabeedna **sheekhii** ayaa wuxuu yiri "**Boqorow waxaani weligey afkayga ma gelin ee iga daa**" **Boqorkii** ayaa markaas ka dalbaday **sheekhii** inuu u gabyo. **Sheekhiina** wuxuu u tiriyeey gabay uu ku tilmaamayo nolosha qurxoon ee **boqorada** iyo tan **qabriga** ku sugaysa oo wuxuu yiri:

باتوا على قلل الأحبال تحرسهم *** غلب الرجال فما أعنتهم القلل
واستنزلو بعد عز عن معاقلمهم *** فأدعوا حفرا يا بئس ما نزلوا
نادى بهم صارخ من بعد ما قبروا *** أيت الأسرة والتيجان والحلل؟
أين الوجوه التي كانت منعمة *** من دونها تضرب الأستار والكل
فأفصح القبر عنهم حين ساءلهم *** تلك الوجوه عليها الدود يقتتل
قد طال ما أكلوا دهرأوما لبسوا *** فأصبحوا بعد طول الأكل قد أكلوا

Wuxuu leeyahay: **Boqoradii** ayaa u hoyday guryo qurxoon oo lagu ilaaliyo laakiin mawdkii ayaa ka soo dejiyey dabaqyadii qurxoonaa oo god xabaal ah oo dhib badan ku riday. Qof soo dul maray qabrigoodii ayaa yiri "Meeye wejiyadii qurxoonaa oo daahyada lagu asturi jirey?" Qabrigii ayaa u jawaabay oo yiri "Wejiyadaas dixri ayaa ku dul dagaalamaya. Wax badan bay wax cuneene, maanta iyagii ayaa la cunayaa!"

Boqorkii ayaa markaa oohintii hayn waayey oo joojiyey sharaabkii wadaadkiina abaal Marin siiyey.

Miraha Amaanada:

Nin **qawsaar** ah oo ido ku raacayey saxaraha dalka Sacuudiga ayaa waxaa u yimid niman gaari ama baabuur watay, waxayna ka codsadeen inuu hal neef ka iibiyo, Wuxuuse u sheegay in uusan isagu lahayn xoolaha oo uusan ka iibin Karin, nimankii ayaa waxay ku yiraahdeen ninkii “ninka xoolaha iska leh wuu lumay dheh!” Kadib ayuu ugu jawaabay, “wuu lumay marmarsiinyo ah Qabrigu ma yaqaan hadhow marka la I geeyo!” Waxay ku yiraahdeen "Cidna kuuma jeedo, 200 oo Riyaalna waan ku siineynaa”

Wuxuu ugu jawaabay “Illaahay baa ii jeeda, xitaa haddii aad i siisaan Laba Boqol oo Kun ma iibinayo!” Waxay weydiiyeen “Maxaa raaxo iyo nolol ku heysataa xoolahan aad raaceyso” Wuxuu ugu jawaabay, “Xalaal inaad shaqeysato ayaa Raaxo & nolol ah.”

Ka waran dadka Alle dhaqaale & Madaxtinimo siiyay oo haddana ummaddii dhacaya, xaqoodiina cunaya, hantidii lagu ammaanaystay kala boobaya, iska daa ammaano ay xafidaane suuqa iyo warbaahinta lasoo istaagaya in ay laaluush qaateen, kana qaateen Masuuliyiintii u sarraaysay, sifa ay ugu meel marsadaan si xaq-darro ah.

Garashada, damiirka, naxariista iyo Alle ka cabsigu ma ahan wax qofku uu aqoon ku kasbado, balse waa Xikmad iyo iimaan Alle bixiyo.

Nin U Soo Islaamay Keliya Inuu Hurdo helo:

Barnaamij ka baxa ama laga sii daayo Telefishinka la yiraahdo **Al-raxma** ayaa caalim lagu magacaabo Sheekh Maxamed Xasan oo u dhashay dalka Masar kana mid ah culumada waa weyn ee caanka ka ah dunida ayaa ka hadlay qiso cajiib ah oo ka waramaysa Nin u soo islaamay kaliya inuu hurdo helo waxaana sheekhu isagoo arimahaas ka hadlaya uu yiri sidan:

Nin u dhashay wadanka Ingiriiska ayaa isagoo aqalkiisa jooga waxaa uu daaqada ka arkay Nin Muslim ah oo beer ku taalla meel aan ka fogayn gurigiisa seexday oo hurdo la dhacay.

Ninka muslimka ah ayaa si daggan inta uu gacmihiisa madaxa ka hoos mariyay iska seexday isagoo u muuqday qof hurdo aad u macaan la dhacay, waxaana intii ninka muslimka ah uu seexanayay oo idil dusha sare kala socday ninkan gaalka ah oo dariishad uu daganaa ka daawanayay, dabeedna waa uu ka soo dagtay gurigiisii waxa uuna u soo dhawaaday ninka muslimka ah ee jiifa, ka dibna waxaa uu arkay inuu hurdo dheer gashaday oo uu khuurinayo.

Aad iyo aad ayuu u yaabay wuuna ka kiciyay hurdadii, markaasuu weydiiyay ‘Ninyahow Adigu yaa tahay?’ ninkii muslimka ahaa ayaa ugu jawaabay ‘waxaan ahay Muslim..!’ ninkii gaalka ahaa ayaa weydiiyay ‘Muslimku ma sidan fudud ayuu u seexdaa?!’ ninkii muslimka ahaa ayaa jawaab ka siiyay, iyadoo sheekadoodiina ay sii socotay.

Ninka gaalka ah ayaa u sheegay ninka muslimka ah inuu muddo raadinayay si uu hurdo ku helo, waxaa uuna u sheegay inuu dawooyin badan u isticmaalay sidii uu u hurdo ku heli lahaa awgeed.

Ninkii markii uu xaaladaas la kulmay ka dib ayuu aaday Markaz Islaami ah, waxaana halkaas uu kaga dhawaaqay Kalimadda Diinta Islaamka lagu soo galo ee Shahaadateynka, iyadoo halkaas lagu baray sida loo tukado.

Habeenkii ayuu seexday Markazka waxaana la tusiyay ama la baray qaabka muslimiintu u seexdaan oo ah in dhanka midigta loo seexdo, ducooyinna la aqriyo, intaa markii loo dhameeyay ayuu la dhacay hurdo aad u macaan.

Waxaa dhacday in loo kiciyay Salaaddii Subax, markaas ayuu ku yiri ‘Maya.maya ha i kicinina..!’ waxuuna dadkii kiciyay u sheegay inuu ka cabsanayo ama ka baqayo inuusan mar dambe hurdo helin haduu kaco, balse raggii kicinayay ayaa ku yiri ‘Waad seexan doontaaye kac, hadda waxaa la joogaa xilligii salaadda..!’

Sidii ayuu ku kacay oo Salaaddii ku tukaday, balse markii Salaadda uu tukaday ayuu damcay inuu seexdo, waxaa lagu yiri ‘sug sug waxyar waxaa inoo dhiman inaan ducooyinka Subaxda aqrisanno, kadibna Shuruuqda aan u fariisanno, kadib ayaad hurdo dheer seexaneysaa Insha’allah..!’

Qisadan ayuu **Sheekh Maxamed Xasan** oo u dhashay dalka Masar waxa uu ku soo gaba-gabeeyey sida Diintu qiimaha badan noogu leedahay ayna sababtay in hurdo oo qura Nin gaal ahi uu ku soo islaamo.

Dhacdadii Miskiga:

Nin la Oran jirey **Abuubakar Almiski** ayaa wuxuu ahaa Nin Caan ah Oo noolaan Jiray xiliyadii Quruuntii Dhexe.

Abuubakar Al Miski Waxa Uu Ahaa Nin Aad U Udgoon badan Hadii Meel Uu Fariisto Dadku Sanka La Raacaan Iyagoo Leh Maasha Allah War Ninku Udgoonaa, Dadku Waxay Moodayaan Nin Dukaan Cadarada lagu iibiyo uu U furanyahay Oo Maalinba Quraarado ama dhalooyin Isku Jabiyo.

Markii Danbe Ee La Waraystay Ayuu Yiri War Waan Idiin Waramayaaye, Waxaan Isku Shubaa Ma jiree Waa Wax ILA Socda Uun Udgoonkani.

Hadaba **Abuubakar Al Miski** isagoo arimahan ka sheekaynaya ayaa waxuu yiri sidan:

Waxaa dhacday Maalin Maalmaha Ka mid Ah ayaa Gabar aanu is garanayno li yeertay waxaana ay igu tiri Muraad Ayaan Kaa Leeyahay Aqalka ama guriga igu imow, dabeedna Markaan Aqalkii gabadhii Galay Ayey Si Degdeg Ah U Xirtay albaabkii.

Waxay gabadhii igu Tiri waxaan doonayaa inaad ii Galmooto oo ILA raaxaysatid Ama Waan Qaylinayaa Oo Boliiska ayaan kugu yeerayaa anigoo u sheegaya inaad doonaysay inaad i kufsato ka dibna waa lagu xirayaa dembi culus ayaana lagugu qaadayaa.

Waxaan U sheegay Inaan Alle ka baqayo kana xishoonayo diyaarna aan u aheyn inaan Xumaan Sameeyo Ee Ay i Sii Dayso, Waanan Waaniyey laakiin Waa ay Diiday.

Waayahaye Hadii Xaalku Halkaa Marayo Waan Dhididsanahaye Aan Musqusha ama Suuliga Kusoo mayrto ama Qubaysto Ayaan Ku iri. Dabeedna Suuligii Ayaan Galayoo Saxaradii Ayaan Isasoo Wada Mariyey markaasaa Anigoo Kankamaya oo urka iga soo haadaya Ayaan Kasoo Baxay musqushii ama suuligii, waxaanan ku dhahay Waa Ikan.

Markii ay Sidaa ii Eegtay Qarmuunkii iga soo baxayay ayey Sanka Qabsatay Waxayna igu Tiri Fadlan Hore li dhaaf, aniguna Waa Intii aan Doonayey Inaan Hore U dhaafo oo Waa Intii aan kala,aa.

Waan Cararay Dadkii Ayaan Iska Qariyey Gurigaygii Ayaan Tegay Dharkii Ayaan Tuuray Waan Qubeystay, Kolkii Aan Qubeystay Ee Aan Is Nadiifiyey Ayaan Cadarka Miskiga Oo Aan Heli Karayey Ayaan Marsaday,

Hadaba Miskigii Aan Maalinta Marsaday Sidii Ayuu ILA Socda Igamaba Go, Ayo Hadaan Dhidido iyo Hadaan Wasakh Kasta Yeesho.

Miskigii Maalintaa Ilaahay Wuxuu Igu Abaal Guday Inaanu Iga Go, in.

ILLAAHAY Farej Ayuu U furaa Qofka Xaaraan Alle Dartii Uga Taga.

Dadku Waxay Garrab Kaaga yihiin Inta Aad Hodanka Tahay:

Xili ay ku beegnayd qarnigii 14-aad ayaa dalka Suuriya tuulo ka mid ah waxaa ku noolaa Nin maal qabeen ah oo la Oran jiray **Abdalla ibnu Saalixi**.

Abdalla waxuu ahaa Nin wax bixin badan tuulada dhana ninka kaliya ee ay fiirsato oo waxii dhiba ah loola yimaado waa uu xalin jiray dadkana waa ay jeclaayeen taas oo ka dhigtay xidiga kaliya ee la fiirsado tuuladaas oo dhan.

Tuulada dadka ku nool badankood ninkan maalqabeenka ayey shaqaalo u'ahaayeen.

Ninkii maalin maal maha ka mid ah ayuu waxuu kasoo galay safar isagoo aad u daalan waxuuna damcay in uu seexdo ama jiipto markaasaa isla markiiba waxaa gurigii soo galay nin xaaskiisa ay ka Umul raacatay oo geeriyootay isla markaana aanu haysan wax dhaqaale ah oo uu ku aaso dabeedna waa uu siiyay.

Abdalla oo damcay inuu aado sariirtiisa ayaa waxaa misana soo galay isla markiiba rag ka tirsan Odayaasha tuulada waxaana ay ka lahaayeen dan ku saabsan dhaqaalo waana uu u fuliyay.

Waxaa hadaba dhacday in ninka maal qabeenka ahaa **Abdalla ibnu Saalixi** uu Gacmaha kor ugu taagay Alle isagoo leh ILLAAHAYOW dadkaan waa ay i dhabeen ee Rabbiyow culeyskooda iga dul qaad.

Ninkii waa uu seexday markii uu soo kacayna waxaa loo sheegay in beerihiisa la gubay Dukaamadiisi Dahabka iyo kuwii catarada la qaatay oo Qolo soo duushayna ay sidaas yeeleen.

Abdalla ibnu Saalixi ninkii taajirka ahaa laba maalin ka dib waxuu waayay qof xataa salaan ugu soo leexda isagoo dariiqa maraya...

Dulucda qisadan waxa ay tahay in Dadku waxa ay daba socdaan aysan aheyn qofka ee waa Maalka ama Xukunka waxaana dhacda in qof kastoo hada la daba yaaco BAL fiiri in horay lagu daba yaaci jiray inta aadan dhaqaalaha helin ama xukunka aadan qaban.

Gabo-Gabo

Buugga Hal-Door Waa buugg soo koobaya sheekooyin xiiso leh waxaan ugu talagalay dhamaan bahada akhriska.

Xuquuqda qoraalka buuggan waxaa iska leh Qoraaga buugga Hal-Door.

Buuggan dib looma daabici karo, wax ka badel laguma sameyn karo ogolaansho la'aan

Iga Gudoon Hal-Door Dhigane Soo Bandhigaya
sheekooyin Dhaxalgal Ah Kusoo Dhowow Dhiganahan
uu Kugu Talagalay Qoraa
Omar Mohamed Ismail (Author
Waa Qisooyin Ku Dhiirigalinaya.

**“Dhiganahan Hal Door
Dhaxalgalka Baritoole”**

